Siiro kooban ee

Cadiyyu bin Xaatim
Al Dh-dhaa'ii

عدي بن حاتم الطائي رضي الله عنه

Saaxiibka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

Ahna awoowaha Reer Baraawe

Waxaa dhigay

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan

Siiro kooban ee

Cadiyyu bin Xaatim
Al Dh-dhaa'ii

عدي بن حاتم الطائي رضي الله عنه

Saaxiibka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

Ahna awoowaha Reer Baraawe

Waxaa dhigay

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan

Tusmada Kitaabka

Mawduuca	Bogga
1. Tusmada kitaabka	3
2. Aarrata dhigaha kitaabka	4
3. Qabiilka Dhayy'i: Al Suwaydii	5
4. Kitaabka Nihaayatu Al Arabi	6
5. Deegaanka qabiilka Dhayy'i	7
6. Kitaabka Usudu Al Ghaabah	7
7. Abtirsigiisa Reer Baraawe	8
8. Kitaabka Siyaru Aclaamu Al Nnubalaa'i	10
9. Kitaabka Siirada ibnu Hishaam	15
10. Zaydu Al Khari iyo wafiga Dhayy'i	15
11. Kitaabka Al Istiicaabu	16
12. Cadiyyu bin Xaatim	18
13. Islaamidda Cadiyyu bin Xaatim	21
14. Al Idriisii: magaalada Baraawe	24
15. Kitaabu Al Zzunuuji	25
16. Hijrada Carabta zamanka Tubbac Al Ximyarii	26
17. Kitaabka Saaxilu Sharqi Ifriiqiyah	30
18. Reer Baraawe	32
19. Wargayska “Al Muslimuuna”	33
20. Wargayska Al Xayaat	34
20. Tariikh nololeedka dhigaha kitaabkaan	37

بسم الله الرحمن الرحيم

Hordhaca dhigaha kitaabkaan

الحمد لله والثناء لله وصلى الله على سيدنا ومولانا محمد وعلى آله الطاهرين الطيبين وسلم تسليما كثيراكلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون، أما بعد،

Daraasaddaanu ma ah mid ku saabsan taariikhda degmada Baraawee. Kumana saabsana nasabka iyo abtirsiga Reer Baraawe. Labadaasba waxaa ku cilmi leh Reer Baraawe, oo ayagaa cid kasta uga cilmi badan. Waase intuu Ilaahay ii suurto geliyay oo labadaas arrin ku saabsan inaan halkaan ka iraahdo. Kitaabkaanu gaar ahaan waa siiro kooban ee saxaabiga wayn Cadiyyu bin Xaatim Al Dh-dhaa'ii**عدي بن حاتم الطائي,** Allaha raalli ka noqdee, oo uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, jeclaa. Waxaanna Ilaahay ka baryayaa inuu iga aqbalo, qofka akhristana uu ku anfaco, ajarkiisana uu ina Xaatim\ **إبن حاتم** iyo dhashiisa iyo aniga labada i dhashay siiyo. Kitaabkaani waa nicmuu Ilaahay igu galladeystay, waxa qalad ah oo ku jirana waxay ka yimaadeen aniga iyo shaydhaan.

Waxaa dhigay midka naxariista iyo dambi dhaafka Ilaahiis faqiirka u ah,
Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM
Winchester, Virginia, dalka Maraykanka
Maalin talaado ah , lixda bisha Ramadaan\ **رمضان** ee sanadka kun iyo afar boqol iyo sideed iyo labaatanka Hijriga, una dhigantah sideed iyo toban Sebtembar laba kun iyo toddoba Miilaadiga.

بسم الله الرحمن الرحيم

Qabiilka Dhayy'iطيئ

Al Suwaydiiالسويددي

Kitaabka la yiraahdo **Sabaa'iku Al Thahabi fii Macrifati Qabaa'ili Al Carabi\سبائك الذهب في معرفة قبائل العرب** waxaa dhigay ninka la yiraahdo Abuu Fawz Muxammad Amiin Al Baghdaadii Al Sh-shahiiru bi Al Suwaydii Al Cabbaasii**أبوفوز محمد أمين البغدادي الشهير بالسويدي العباسي**, oo ka mid ah dhasha Al Cabbaasu**العباس**, adeerka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kuna dhashay Baghdaad**بغداد**, kana mid ahaa culummadeeda, kuna dhintay Najd**نجد** isagoo xajka kasoo laabtay. Kutubbadiisa kale waxaa ka mid ah "Qalaa'idu al ddurari fii sharxi risaalataa ibnu Xajar**قلائد الدرر في شرح رسالة إبن حجر**" oo fiqiga shaaficiyada ku saabsan. Wuxuu dhintay sanadka kun laba boqol kow iyo afartan Hijriga una dhiganta kun sideed boqol shan iyo labaatan miilaadiga. Nuskhooyinka aan anigu haysto midkood waxaa lagu daabacay Daaru al Kutub Al Cilmiyyah**دار الكتب العلمية** ee Bayruut**بيروت** Lubnaan**لبنان** sanadka kun iyo afar boqol iyo shan iyo toban Hijrada, una dhiganta kun iyo sagaal boqol iyo shan iyo sagaashan Miilaadiga ah. Al Suwaydii**السويدي** wuxuu yiri:

"qabiilka Dhayy'i**طيئ** waa qabiil ka tirsan qabiilka Kahlaan**كهلان**, qofka u dhashana waxaa la yiraahdaa Dhaa'ii**طائي**, waxayna degganaan jireen Yaman**يمن.** Markaasay waxay daba galeen oo ay Yaman**يمن** ka baxeen markuu isaguna Yaman**يمن** ka baxay qabiilka Azd**الأزد** (waana markuu burburay biyo xireenka Ma'rib**سد مأرب**), waxayna degeen Sumayraa'**سموراء**, waxaana la yiri inay ku degeen maganta Banii Asad **بني أسد**. Kaddibna waxay Banii Asad**بني أسد** uga adkaadeen oo kala areegeen laba buurood oo la yiraahdo Ajaa**أجا** iyo Salmaa**سلمى**, ahna laba buurood oo beledkooda ku yaalla oo haddana loo yaqaanno "labada buurood ee Dhayy'i**طيئ** (Al Madiinah Al Munawwaraha**المدينة المنورة** ka xiga xagga waqooqyiga)." Halkaasay ku nagaadeen, oo ay markaas islaamka bilowgiisa arliga ku kala firireen marka dalalka la furtay.

Ibnu Saciid**إبن سعيد** wuxuu yiri:

"arligooda waxaa deggan oo ka buuxa ummado badan oo buuxiyay buuraha iyo arliga intiisa fidsanba ee Xijaaz**الحجاز** iyo Shaam**الشام** iyo Ciraaq**عراق**."

Wuxuu yiri:

"ayagaana iska leh madaxtinnimada Carbta dhexdooda ilaa maanta arliga Ciraaq**عراق** iyo Shaam**الشام**. Waxayna u qaybsamaan jilbo kala duwan."

Wuxuu yiri:

"Kahlaan**كهلان** waa ina Saba' bin Yashjub bin Yacrub bin Qaxdhaan (oo ah Nabi Idriis walaalkiisa la dhashay) bin Caabir bin Shaalikh bin Arfakh-shad bin Saam bin Nuux **سبأ بن يشجب بن يعرب بن قحطان بن عابر بن شالخ بن أرفخشد بن شام بن نوح**." Runtana Rabbi ayaa og.

Kitaabka Nihaayatu Al Arab\نهاية الأرب

Abuu Al Cabbaas Axmad bin Calii bin Axmad bin Cabdu Allaahi Al Shihaab bin Al Jamaal ibnu Abii Al Yaman Al Qalqashandii Al Sh-shaaficii **أبو العباس أحمد بن علي بن أحمد بن عبد الله الشهاب بن جمال إبن أبي يمن القلقشندي الشافعي**, wuxuu ku dhashay beledka la yiraahdo Qalqashandah **قاقشندة** oo ka tirsan degmada Al Qayluubiyyah**القيلوبية** ee arliga Masar **مصر\,** asalkiisuna Carab yahay (ayagoo ayan dadka masaari**المصريين**\ la yiraahdo ayan Carab ahayn ee bal ay ku abtirsadaan Xaam ina Nuux **حام بن نوح** oo dhalay dadka madow iyo masaarida) oo gala qabiilkiisu Banuu Badr**بنوبدر** ee Banuu Fazaarah**بنوفزارة** oo ka tirsan qabiilka Qays Caylaan **قيس عيلان** ay Masar**مصر** soo galaan marka la furtayoo degeyna oo madax u noqday gobolka Al Qayluubiyyah**القليوبية**. Waxaana la oofsaday sanadka Hijriga ah ee sideed boqol kow iyo labaatan isagoo shan iyo lixdan sano jira, wuxuuna ku dhintay laguna duugay Qalqashandah**قلقشندة.** Wuxuu kitaabkiisa Nihaayatu Al Arab fii Macrifati Qabaa'ili Al Carabi **نهاية الأرب في وعرفة قبائل تلعرب\,** oo lagu daabacay Daaru Al Kutubi Al Cilmiyyah **دار الكتب العلمية** ee Bayruut**بيروت** arliga Lubnaan**لبنان** ku yiri:

"Banuu Dhayyi'**بنوطيئ** waa qabiil ka tirsan Kahlaan**كهلان** oo qabaa'ilka Qaxdhaan**قحطان** ka mid ah, waana Banuu Udud bin Zayd bin Yashjub bin Curayb bin Zayd bin Kahlaan**بنو أدد بن زيد بن يشجب بن عريب بن زيد بن كهلان** (Kahlaanna**كهلان** waa ayuu yiri: "Kahlaan bin Saba' -waana qabiilka aabihiis oo Ximyarka tirsan-bin Yashjub bin Yacrub bin Qaxdhaan bin Huud bin Caabir bin Shaalikh bin Irfakh-shad bin Saam bin Nuux **كهلان بن سبأ _ أبوالقبيلة من حمير – بن يشجب بن يعرب بن قحطان بن هود بن عابر بن شالخ بن إرفخشد بن سام بن نوح**).
Dhayyi'**طيئ** wuxuu dhalay Qudhrah**قطرة** iyo Al Ghawth**الغوث**, hooyadoodna waa Cadiyyah bintu Al Aamirii**عدية بنت الآمري** oo u dhalatay Mahrah**مهرة** (waa Carabka Maxamuud Saalax kuway soomaalidu tiraahdo oo Yaman**يمن** dega), nasabkoodana waxaa la yiraahdaa Dhaa'ii**طائي**, ayagaana loogu abtiriyaa Xaatim Al Dhaa'ii**حاتم الطائي,** midka ku caan baxay deeqsinnimada, warkiisuna uu ka caan san yahay in la xuso.
Al Cibarna**العبر** wuxuu ku yiri:
"waxaana ka dhashay Zaydu Al Khayli bin Muhalhil**زيد الخيل بن مهلهل** saxaabiga Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wafdi ahaan ugu yimid isagoo wada wafdiga Dhayy'i**طيئ** oo islaamay uuna Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u bixiyay Zaydu Al Kahyri **زيد الخير**, uuna yiri:

"ما وصف لي أحد في الجاهية رأيته في الإسلام إلا رأيته دون وصفه غيرك."

"Maa wusifa lii axadun fii al jaahiliyati ra'aytuhu fii al islaami illaa ra'aytuhu duuna wasfihi gharaka."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Axadana zamanka jaahiliyada la iima sifayn oo aan markaas ku arkay

islaamka dhexdiisa oo waa kan illaa ka yar sida la iigi sifeeyey intaan adiga ahayn."

Deegaanka qabiilka Dhayy'i\طيئ

Waxayna degganaayeen Yaman\يمن oo ay kasoo guureen ayagoo ku jooga raadka Al Azminata\الأزمنة (malaha waa Al Azd\الأزد), waxayna degeen Sahiir\سهير meesha la yiraahdo, waxaana la yiri inay ku degeen maganta Banii Asad\بني أسد oo ay markaas ka faro maroorsadeen oo uga adkaadeen labada buurood ee Ajaa'a\أجاء iyo Salmaa\سلمى, ahna labada buurood oo arligooda ku yaalla oo hadda loo yaqaanno "labada buurood ee Dhayy'i\طيئ."

Halkaasay degeen oo ku nagaadeen, markuu islaamku arliyada kale furtayna way kala tageen oo ay meelahaas degeen.

Ibnu Saciid\إبن سعيد wuxuu yiri:
"arligooda waxaa deggan oo ka buuxa ummado badan oo buuxiyay buuraha iyo arliga intiisa fidsanba ee Xijaaz\الحجاز iyo Shaam\الشام iyo Ciraaq\عراق."

Wuxuu yiri:
"ayagaana iska leh madaxtinnimada Carbta dhexdooda ilaa maanta arliga Ciraaq\عراق iyo Shaam\الشام. Jilbo ayaga ka mid ah ayaana Masar\مصر dega."
Waa intaas warka Al Qalqashandii\القلقشندي.

Arligaas Dhayy'i\طيئ wuxuu u dhexeeyaa Al Madiinah Al Munawwaraha \المدينة المنورة iyo Duumatu Al Jandal\دومة الجندل waxayna xigtaa xagga Duumatu Al Jandal\دومة الجندل oo ay u dhowdahay. Duumatu Al Jandal \دومة الجندل waxay Al Madiinah\المدينة waqooyiga ka xigtaa qiyaas afar boqol iyo konton kiiloomitir, una dhexeysaa ayada iyo Dimishiq\دمشق, siduu Al Balaadii\البلادي u yiri.

Kitaabka Usudu Al Ghaabah\أسد الغابة

Al Imaamu al muxaddath Calii bin Muxammad bin Cabdu Al Kariimi bin Cabdu Al Waaxid Al Jazarii, Al Shaybaanii, Abuu Al Xasan **الإمام المحدث علي بن محمد بن عبد الكريم بن عبد الواحد الجزري، الشيباني، أبو الحسن**, koofaartiisuna Cizzu Al Ddiini\عز الدين tahay, loona yaqaanno Ibnu Al Athiir\إبن الأثير, wuxuu ku dhashay Jaziiratu ibnu Cumar\جزيرة إبن عمر, ee waqooyiga Ciraaq\عراق ku taalla sanadka shan boqol shan iyo konton, una dhigantah kun boqol iyo lixdan ee miilaadiga ah, wuxuuna ku dhintay Al Muusil\الموصل ee waqooyiga dalka Ciraaq\عراق sanadka lix boqol iyo soddon Hijrada una dhiganta kun laba boqol saddex iyo soddon miilaadiga ah. Wuxuu ahaa caalin ku xeel dheer taariikhda iyo nasabka iyo adabta suugaanta ah. Kutubbaduu allifay waxaa ka mid ah kitaabka Al Kaamilu

الكامل\ oo laba iyo toban mujallad ka kooban kuna saabsan taariikhda ilaa sanadka lix boqol sagaal iyo labaatan, oo uu Al Ziriklii\الزركلي yiri:
"inta badan ee culummada taariikhda oo isaga ka dambeeyey waxay ciyaal u yihiin oo ka barteen kitaabkiisaan".
Wuxuu kaloo dhigay kitaabkaan la yiraahdo Usudu Al Ghaabah fii macrifati al ssaxaabah\أسد الغابة في معرفة الصحابة. Imaamkaanu wuxuu kitaabkiisa u nidaamiyay xagga xuruufta hijaa'iga ah, wuxuuna Cadiyyu bin Xaatim\عدي بن حاتم ka yiri inta soo socota.

Abtirsigiisa Reer Baraawe

Cadiyyi bin Xaatim\عدي بن حاتم abtirsigiisu waa sidatan: "waa Cadiyyu bin Xaatim bin Cabdu Allaahi ibnu Sacd bin Al Xashraj bin Imri'u Al Qays bin Cadiyyi ibnu Akhzam bin Abii Akhzam bin Rabiicah bin Jarwal ibnu Thucal bin Camr bin Al Ghawth bin Dhayyii Al Dh-dhaa'ii عدي بن حاتم بن عبد الله إبن سعد بن الحشرج بن إمرأ القيس بن عدي إبن أخزم بن أبي أخزم بن ربيعة بن جرول إبن ثعل بن عمرو بن الغوث بن طي الطائي\.

Aabihiis Xaatim\حاتم waa deeqsiga deeqsinnimo lagu tilmaamo oo tusaaleba looga dhigay. Cadiyyu\عدي koofaartiisu waa Abaa Dhariif أبا طريف\, waxaana kaloo la yiri waa Abuu Wahb\أبووهب. Ragga nasabka ku xeel dheer way isku khilaafeen magacda qaarkood oo ku saabsan ilaa Dhayyi'i\طيئ.

Cadiyyu bin Xaatim\عدي بن حاتم wuxuu wafdi ahaan Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ugu yimid sanadka sagaalaad ee Hijriga bisha Shacbaan\شعبان. Waxaa kaloo la yiri sanadka tobanaad, markaasu islaamay, wuxuuna ahaa krishtaan.

Wuxuu kaloo yiri:
"wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka wariyay Axaadiith badan. Marka Nabiga la oofsaday, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu Al Madiinah\المدينة ugu yimid Abuu Bakr Al Ssiddiiqu أبوبكر الصديق\ zamanka riddada\الردة (Oo ah markay qabaa'il Carbeed bixinta zakada maalkooda diideen inay bixiyaan qaarkoodna ay Diinta ka noqdeen oo uu markaas Abuu Bakr Al Ssiddiiqu\أبوبكر الصديق ku qaaday dagaallada loo yaqaan "Xuruubu Al Riddah\حروب الردة", ahna dagaalka ugu horreeyey taariikhda basharka oo loo qaaday u danaynta dadka saboolka si xaqqooda Ilaahay u qoondeeyey loo soo celiyo oo ah zakada maalka) isagoo sida zakada maalka tolkiis, wuxuuna ku sugnaaday Diinta Islaamka, murtadna ma noqon Diinta ka noqda. Tolkiisna way la sugnaadeen. Wuxuu ahaa nin deeqsi ah, madax u ah tolkiis ayna aad u weyneeyaan, qabaa'ilka kalena ay weyneeyaan. Wuxuu ahaa nin jawaabta iyo hadalka isla markiiba hela, waxaana laga wariyay inuu yiri:
"sooma gelin waqtiga salaadda ee wuxuu soo galaa anigoo u xiiso qaba."

Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu karaameyn jiray markuu u yimaado.
Caamir bin Al Shacbiyyu\عامر الشعبي wuxuu wariyay oo yiri:
"markay ahayd zamanka Cumar\عمر, Allaha raalli ka noqdee, ayuu Cadiyyu bin Xaatim\عدي بن حاتم wuxuu u yimid Cumar\عمر. Markaasuu markuu usoo galay ayuu wuxuu Cumar\عمر ka dareemay adayg iyo soo dhowayn la'aan fiican.
Markaasuu wuxuu yiri:
"Amiiru Al Mu'miniinow\أمير المؤمنين ima taqaanid miyaa?"
Cumar\عمر wuxuu yiri:
"haa oo wa Allaahi\والله waan ku aqaannaa oo Ilaahay wuxuu kugu karaameeyey aqoonsiga ugu fiican. Wa Allaahi\والله waan ku aqaannaa oo waad islaantay markuu dadku gaaloobay, waana aqoonsatay markay inkireen, waadna oofisay markay khayaaneen, waadna timid markay dhabarka jeediyeen."
Markaasuu wuxuu yiri:
"igu filan Amiiru Al Mu'miniinow\أمير المؤمنين! Igu filan!"

Cadiyyu\عدي wuxuu ka qayb galay duullaannada lagu furrtay Ciraaq\عراق, iyo duullaanka Al Qaadisiyyah\القادسية iyo duullaanka Mihraan\مهران iyo Maalinta Yawmu Al Jisri\يوم الجسر isagoo la socda Abii Cubaydah **أبي عبيدة**\ oo ciidanka watay, iyo duullaanno kaleba.

Wuxuu la socday oo uu ciidankiisa ka mid ah Khaalid bin Al Waliid **خالد بن الوليد**\ markuu ku duulay Shaam\الشام, uuna kala qayb galay furashooyinkooda qaarkood.

Cadiyyu\عدي wuxuu degay Al Kuufah\الكوفة (ee arliga Ciraaq\عراق). Al Shacbiyyu\الشعبي wuxuu yiri:
"Al Ashcath bin Qays\الأشعث بن قيس ayaa wuxuu Cadiyyu bin Xaatim **عدي بن حاتم**\ cid u diray kasoo isticaaraysata digsiyadiisa wax lagu karsado. Markaasuu u dhiibay ayagoo buuxa oo ay raggu u geeyeen. Markaasuu Al Ashcathu**الأشعث** wuxuu usoo faray:
"waxaan doonaynnay ayagoo maran."
Markaasuu Cadiyuu\عدي u faray:
"annagu ayagoo maran ma isticaaraynno, oo ma amaahinno weeye!"

Cadiyyu\عدي wuxuu quraanyada u jejebin jiray muufada wuxuuna yiraahdaa:
"daris ayay nala yihiin, dariskuna xaq ayuu leeyahay!"

Cadiyyu\عدي wuu ka iishay Cuthmaan\عثمان, markaasuu marka Cuthmaan **عثمان** la dilay wuxuu yiri:
"dilkiisa laba waxarood isku hardin mayaan."

Markaasay markay ahayd Maalinta Yawmu Al Jamali**يوم الجمل** ayaa il laga tuuray, wiilkiisa Muxammadna**محمد** waxaa la dilay isagoo Calii**علي** la jira, wiilkiisa kalena waxaa la dilay isagoo Al Khawaarij**الخوارج** la jira. Markaasaa waxaa lagu yiri:
"Abaa Dhariifow**أبا طرف**, dilka Cuthmaan**عثمان** laba waxarood ma isku hardiyeen?"
Wuxuu yiri:
"wa Allaahi**والله** haa iyo orgiga waynba!"

Wuxuu Calii**علي** kala qayb galay Duullaanka Siffiin**صفين**.
Waxaa la oofsaday sanadka toddoba iyo lixdan, waxaa kaloo la yiri sideed iyo lixdan iyo sagaal iyo lixdanba, isagoo jira boqol iyo labaatan sano. Wuxuuna ku dhintay Al Kuufah**الكوفة**."
Waa intaas warkaan kitaabkaas kasoo qaadannay.

Wuxuuna wariyay Xadiithka hoos ku qoran oo Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo isaga amarkiisa ku saabsan iyo islaamiddiisa iyo taladay siisay walaashiis Saffaanah bintu Xaatim **صفانة بنت حاتم**\, anna ku arki doonno Xadiithka ibnu Isxaaq**حديث إبن إسحاق** inshaa'a Allaahu**إن شاء الله**.

Kitaabka Siyaru Aclaamu Al Nubalaa'i\سير أعلام النبلاء

Al Imaamu Al Xaafithu Abuu Cabdu Allaahi Muxammad bin Cuthmaan Al Th-thahabii**الإمام الحافظ أبو عبد الله محمد بن عثمان الذهبي**, oo noolaa inta u dhexeysey sanadaha lix boqol iyo saddex iyo toddobaatan ilaa toddoba boqol iyo sideed iyo afartan Hijriga, kutubbaduu dhigay waxaa ka mid ah Siyaru Aclaamu Al Nubalaa'i**سير أعلام النبلاء** , uu hareerihiisana ku dhigan yiahay kitaabkiisa kale oo la yiraahdo Ixkaamu al rrijaali min miizaani al ictidaali**إحكام الرجال من ميزان الإعتدال**. Kitaabkaanu wuxuu ka kooban yahay toddoba iyo toban mujallad iyo laba mujallad oo fahaarista ah. Nuskhada aan haystana waxaa lagu daabacay Daaru Al Fikri**دار الفكر** ee Bayruut **بيروت**\ dalka Lubnaan**لبنان** sanadka Hijriga ah ee kun afar boqol toddoba iyo toban, una dhiganta kun sagaal boqol toddoba iyo sagaashan miilaadiga.
Al Imaamu Al Th-thahabii**الإمام الذهبي** wuxuu kitaabkiisa Siyaru Aclaamu Al Nubalaa'i\سير أعلام النبلاء ku wariyay:
"waa saaxiibka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waana midka deeqsinnimada tusaalaha looga dhigo. Cadiyyu**عدي** wuxuu wafdi ahaan ugu yimid Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, sanadka toddobaad dhexdiisa, markaasuu karaameeyey oo uu ixtiraamay. Wuxuuna wariyay Axaadiith.

Wuxuu degay Al Kuufah**الكوفة**, kaddibna Qarqiisiyaa**قرقيسيا** ee Al Jaziirah **الجزيرة**\ (kuna taalla isla dalka Ciraaq**عراق**).

Ayyuub Al Ssakhtayaanii\أيوب السختياني wuxuu ka wariyay ibnu Siiriin إبن سيرين\ inuu Abuu Cubaydah bin Xuthayfah\أبوعبيدة بن حذيفة yiri:
"dadkaan waxaan waydiinayay warka Cadiyyu bin Xaatim\عدي بن حاتم, isagoo meel ii dhow fadhiya. Markaasaan goostay inaan u tago oo aan weydiiyo. Markaasaan u imid oo aan Xadiithkiisa ka wareystay wuxuuna yiri:

"Nabigaa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lasoo diray, markaasaan kahday. Kaddibna waxaan joogay arliga roomaanka markaasaan is iri: "ninkaan ayaan u tegayaa oo hadduu runlow yahay waan raacayaa." Markaasaan markaan Al Madiinah\المدينة imid ayuu dadku i arkay (oo ay magaciisa ku dhawaaqeen oo yiraahdeen waa Cadiyyu bin Xaatim عدي بن حاتم!) markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu igu yiri:

"يا عدي أسلم تسلم!"

"Yaa Cadiyyu! Aslam taslam!"
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Cadiyyow\عدي islaan waad nabad geleysaaye!"
Waxaan iri:
"anigu diin ayaan leeyahay."

Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu yiri**:**

"أنا أعلم بدينك منك. ألست ترأس قومك؟"

"anaa aclamu bi diinika minka. A lasta tar'asu qawmaka?"
Xadiithka amcnihiisu waxaa weeye:

"anigaa diintaada kaaga aqoon badan, oo soo tolkaa madaxweyne uma tihid?"
Waxaan iri:
"haa."
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"ألست ركوسيا تأكل المرباع؟"

"A lasta rakuusiyyan ta'kulu al mirbaaca?"
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"soo rakuusi ma tihid (waana diin aan hadda jirin oo la oran jiray Al Rakuusiyyah\الركوسية oo ahayd krishtaan iyo yuhuud isku qasan), waxaadna cunta mirbaaca\المرباع? (mirbaacu\المرباع wuxuu ahaa sidatan: markuu qabiilkiisu duulo waxay soo furtaan intaan la qaybin horteed isaga boqor ahaan wuxuu lahaa rubuca xoolahaas taasoo mirbaac la oran jiray,

inta soo hartana wuxuu ku lahaa qaybtiisa kusoo aadda marka ragga loo qaybiyo)"
Waxaan iri:
"haa."
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri**:**

"فإن ذلك لا يحل لك في دينك."

"fa inna thaalika laa yaxillu laka fii diinika."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"taasu diintaada xalaal kuuguma ah?" (oo waxaa weeye in shareecooyinkii shareecada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka horreeyey aan Anbiyada iyo dadka loo dirayba ayan xalaal u ahaan jirin inay ghanaa'imta**الغنائم** cunaan oo qaataan. Al Bukhaarina**البخاري,** waana Xadiithkiisa saddex boqol shan iyo soddon, wuxuu Jaabir**جابر** ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"أعطيت خمسا لم يعطاهن أحد قبلي، نصرت بالرعب مسيرة شهر، وجعلت لي الأرض مسجدا وطهورا، فأيما رجل من أمتي أدركته الصلاة فليصل، وأحلت لي الغنائم ولم تحل لأحد قبلي، وأعطيت الشفاعة، وكان النبي يبعث إلى قومه خاصة وبعثت إلى الناس عامة."

"ucdhiito khamsan lam yucdhahunna axadun qablii: (1) **nusirtu bi al rrucbi masiirata shahrin,** (2) **wa jucilat liya al ardu masjidan wa dhuhuuran, fa ayyamaa rajulun min ummatii adrakathu al ssalaatu fal yusalli,** (3) **wa uxillat liya al ghanaa'imu wa lam taxilla li axadin qablii,** (4) **wa ucdhiito al sh-shafaacata,** (5) **wa kaana Al Nabiyyu yubcathu ilaa qawmihi khaassatan wa bucith-tu ilaa al nnaasi caammatan."**
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"waxaa la i siiyay shan aan axadna aniga hortay la siin, oo kala ah:
(Kow) waxaa la iigu gargaaray argagaxa ilaa meel bil loo safro, oo marka magacayga laga maqlo la cabsadaa oo la argagaxaa", oo sidaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, cadawgiisa uga adkaadaa.
Imaam ibnu Xajar Al Casqalaani**الإمام إبن حجر العسقلاني** markuu Xadiithkaan sharxayo wuxuu sheegayaa inay taasu ummaddiisana la siiyay oo laga cabsado oo laga argagaxo. Waana hub uu Ilaahay islaamka iyo muslimiinta ku taageero, cadawgoodana ku jebiyo. Culummada muslinku waxay yiraahdeen inuu argagaxaasu u jiro sidoo kale ummaddiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ilaa maalinta qiyaame, siduu u wariyay Fatxu Al Baarii bi sharxi saxiixi Al Bukhaarii**فتح الباري بشرح صحيح البخاري** mujalladka koowaad, Xadiithka saddex boqol shan iyo soddon oo ku yaalla bogga sahn boqol sagaal iyo toddobaatan, laduna daabacay Daaru

Al Fikri\دار الفكر ee Bayruut\بيروت arliga Lubnaan\لبنان kun sagaal boqol saddex iyo sagaashan.)

Markaasaan taas oggolaaday inay sidaas tahay. Kaddibna wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"يا عدي أسلم تسلم! فأذن مما يمنعك أن تسلم خصاصة تراها بمن حولي، وأنك ترى الناس علينا إلبا واحدا. هل أتيت الحيرة؟"

"Yaa Cadiyyu aslam taslam. Fa athunnu mimmaa yamnacaka an tuslima khasaasatun taraahaa bi man xawlii, wa annaka taraa al nnaasa calaynaa ilban waaxidan. Hal atayta Al Xiirata?"
oo macnihiisu yahay:

"Cadiyyow\عدي islaan waad nabad geleysaaye! Waxaan u malaynayaa ina waxa kaa hortaagan inaad islaantid ay ka mid yihiin saboolnimada dadka hareerahayga jooga oo i raacsan iyo inaad aragtay inay dadka intiisa kale nala wada colloobeen. Hore ma u tagtay magaalada Al Xiirah\الحيرة (oo ah magaalo ku taalla arliga Ciraaq\عراق)?" Waxaan iri:
"hore uma tegin, meeshay ku taallase waan aqaanna."
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam kaddib yiri:

"توشك الظعينة أن ترتحل من الحيرة بغير جوار حتى تطوف بالبيت، ولتفتحن علينا كنوز كسرى."

"tuushaku al thaciinatu an tartaxila mina Al Xiirata bi ghayri jawaarin xattaa tadhuufa bi Al Bayta, wa la tuftaxunna calaynaa kunuuzu Kisraa."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"waxaa mar dhow dhici doona inay haweeney rati saaran kasoo kacdo Al Xiirah\الحيرة ayadoo ayan rag ilaaliya la socon oo ay Makkah\مكة timaaddo oo ay Kacbada ku dhawaafto (waa Xaj ama Cumro). Waxaa kaloo naloo furi doonaa oo aan la wareegeynna kunuuzta, waa maalkee, boqorka Furus ee Kisraa\كسرى."
Waxaan iri:
"waa Kisraa bin Hurmuz\كسرى بن هرمز (waana ninka lagu magacaabay jiirta Hurmuz\هرمز oo ah gacanka biyaha oo kala qaybiya Jaziiradda Carabta iyo Iiraan)".

Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"كسرى بن هرمز! وليفيضن المال حتى يهم الرجل من يقبل منه ماله صدقة."

"Kisraa bin Hurmuz! Wa la yafiidanna al maalu xattaa yuhimma al rajulu man yaqbalu minhu maaluhu sadaqatan".
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"haa waa Kisraa bin Hurmuz\كسرى بن هرمز! Maalka muslimiintuna wuxuu u badanayaa ilaa uu ka gaaro heer uu niku waayo qof zakada maalkiisa uu siiyo oo ka qaata."

Cadiyyu\عدي wuxuu yiri:
"Saddexdaas arrimood laba waan arkay (oo ah haweeney Al Xiirah\الحيرة keligeed rati kasoo raacday oo soo xajiday -shareecaduna waa sidaas oo haweentu keligeed waa xajjin kartaa ee in haweenta lagu xiro inay muxrim wadato si visa loo siiyo waa qanuun ay dawladda sucuudiga dejisay ee ma aha shareecada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam- iyo waxaan arkay furashada boqortooyada iiraan oo wuxuu yiri:
"waxaan ka mid ahaa fardooleyda ugu horreysey oo ku duulay kunuuzda Kisraa bin Hurmuzكسرى بن هرمز.") waxaanna ku dhaartay Ilaahay inay tan saddexaadna imaan doonto, aanna ula dan leeyahay badashada maalka."

Ibnu Cuyaynah\إبن عيينة wuxuu wariyay inuu Cadiyyu\عدي yiri:
"tan iyo goortaan islaamay salaadi sooma gelin anigoo wayso qaba mooyee."

Abuu Cubaydah\أبوعبيدة wuxuu yiri:
"Maalinta Siffiin\يوم صفين (waana markay ciidammada Imaam Calii bin Abii Dhaalib\الإمام علي بن أبي طالب Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam iyo ciidammada Mucaawiyah\معاوية, Allaha raalli ka noqdee meesha Siffiin\صفين la yiraahdo isaga hor yimaadeen) Cadiyyu bin Xaatim عدي بن حاتم\ isagaa madaxa u ahaa ciidanka qabiilka Dhayyi'\طيئ isagoo Caliiعلي la saf ah."

Abuu Isxaaq\أبوإسحاق wuxuu yiri:
"waxaan arkay Cadiyyu\عدي wuxuuna ahaa nin jir wayn oo cawir il la' ah (oo waa tan Maalinta Al Jamal\يوم الجمل looga tuuray sidaan usoo aragnay), kuna kor sujuudaya darbi dhererkiisu qiyaas hal diraac yahay."

Abuu Xaatim Al Ssijistaanii\أبوحاتم السستاني wuxuu yiri:
"Cadiyyu bin Xaatim\عدي بن حاتم wuxuu noolaa boqol iyo sideetan sano."

Jariir\جرير wuxuu Al Mughiirah\المغيرة ka wariyay inuu yiri:
"Cadiyyu\عدي iyo Jariir Al Bajaliyyu\جرير البجلي iyo Xanthalah al kaatib حنظلة الكاتب\ waxay ka baxeen Al Kuufah\الكوفة waxayna degeen Qarqiisiyaa'a\قرقيسياء, waxayna yiraahdeen:
"joogi maynno oo degi maynno balad dhexdiisa Cuthmaan\عثمان lagu caayayo."
Waa intaas warkaan Al Nubalaa'i\النبلاء kasoo qaadannay.

Al Ziriklii\الزركلي wuxuu kitaabkiisa Al Aclaamu\الأعلام ku wariyay inuu Cadiyyu bin Xaatim\عدي بن حاتم Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka wariyay lix iyo lixdan Xadiith.

Kitaabka Siirada ibnu Hishaam\سيرة إبن هشام

Zaydu Al Khayri iyo wafdiga Dhayyi'ii\زيد الخير ووفد طيئ

Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu yiri:
"Rasulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa u yimid wafdiga Dhayyi'**طيئ**, uuna ka mid yahay Zaydu Al Khayli**زيد الخيل,** oo ah odagooda.

Markaasay markay u yimaadeen Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la hadleen, uuna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, islaamka usoo bandhigay, ayaguna ay islaameen, islaamkooduna noqday mid fiican.

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"ما ذكر لي رجل من العرب بفضل ثم جاءني إلا رأيته دون ما يقال فيه، إلا زيد الخيل، فإنه لم يبلغ كل ما كان فيه."

"Maa thukira lii rajulun mina Al Carabi bi fadlin thumma jaa'anii illaa ra'aytuhu duuna maa yuqaalu fiihi, illaa Zaydu Al Kahyli, fa innahu lam yablugh kulla maa kaana fiihi."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Nin kasta oo Carab oo deeq la iigu sheegay, waana tilmaamo wanaagsan oo uu leeyahay uuna dadka dheer yahaye, kaddibna aniga ii yimid, waxaan arkay inuusa deeqda lagu sheegay wada lahayn, intaan ka ahayn Zaydu Al Khayli**زيد الخيل** oo deeqda lagu sheegay ay ka yartahay deeqduu leeyahay."

Kaddibna Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu u bixiyay Zaydu Al Khayri**زيد الخير**, wuxuuna u gooyey dhulka Fayd**فيض** iyo Ardiin\أرضين, sidaas ayuuna qoraal ugu siiyay.

Markaasuu Zaydu Al Khayri**زيد الخيل** Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam kasoo tegay isagoo tolkiis usoo laabanaya iyo arligiisa. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wsallam, yiri**:**

"إن ينجوا من حمى المدينة."

"in yanju Zaydu min xummaa Al Madiinah",
oo macnihiisu yahay:

"Haduu Zayd**زيد** ka badbaado qandhada Al Madiinah**المدينة**."
(bilowga Hijrada iyo zamannadii ka horreeyeyba Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة** waxay lahayd kaneeco badan, markaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markuu usoo hijrooday oo ay asxaabtiisu bukoodeen ka Alle baryay uuna weydiistay in loo qaado

xagga iyo meesha al yiraahdo Al Juxfah**الجحفة** oo uu Ilaahay ka qaaday oo uu Al Juxfah**الجحفة** geeyey. Al Juxfah**الجحفة** waxay laba iyo labaatan kiiloomitir xagga qorrax kasoo bax ka xigta Raabigh**رابغ**, oo ah beled yar oo in yar kasoo horreysa degmada Raabigh**رابغ**. Degmadaas waxaa Al Juxfah**الجحفة** loogu bixiyey ayadoo uu daad weyn kusoo rogmaday oo uu qaaday: "Fa ajfaxahum**فأجحفهم**" oo ah "waa qaaday". Sidaas ayaa Al Juxfah**الجحفة** loogu bixiyey."
Al Juxfah**الجحفة** waa beled yar oo in yar kasoo horreysa degmada Raabigh. Waxayna Makkah Al Mukarramah**مكة المكرمة** u jirtaa boqol iyo toddoba iyo sideetan kiiloomitir. Culummada qaarkood waxayba yiraahdaan in kaneecadaas lagu ilaalinayay Al Madiinah**المدينة** inayan dadku jeclaan oo soo degin jeer uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, usoo haajiro!)

Wuxuu yiri:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu qandhada ku magacaabay magac aan xummaa**حمى** ahayn, aanna Ummu Maldam**أم ملدم** ahayn, waanse illoobay."

Markaasuu markuu gaaray magaalo ku taalla Najd**نجد** iyo ceel ceelashooda ka mid ah oo la yiraahdo Fardah**فرضة** ayay qandho ku qabatay oo uu dhintay. Markaasuu markuu dhintay ay haweentiisu qaadatay qoraalkuu soo siiyay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo ay dab ku gubtay."

Kitaabka Al Istiicaabu**الإستيعاب**

Al imaamu al callaamah, xaafithu Al Maghribi, Shaykhu Al Islaami Abuu Cumar**الإمام العلامة، حافظ المغرب، شيخ الإسلام أبو عم**, magaciisuna yahay Yuusufu bin Cabdu Allaahi bin Muxammad bin Cabdu Al Barri bin Caasim Al Namariyyu, Al Andalusiyyu, Al Qurdhubii, Al Maaliki **يوسف بن عبد الله بن محمد بن عبد البر بن عاصم النمري، الأندلسي، القرطبي، المالكي**, loona yaqaanno ibnu Cabdu Al Barri**إبن عبد البر**, wuxuu allifay kutubbo badan oo ka mid ah hooyooyinka kutubka islaamka laga qaato. Wuxuu dhashay bisha Rabiicu Al Aakhar**ربيع الآخر** ee sanadka saddex boqol sideed iyo lixdan Hijriga, kuna noolaa Qurdhuba**قرطبة** ee Spaaniya, wuxuuna dhintay habeen jimce ah ee dhammatka sanadka afar boqol saddex iyo lixdan Hijriga.
Kutubbaduu dhigayna waxaa ka mid ah Al Istiicaabu fii macrifati Al Asxaabi**الإستيعاب في معرفة الأصحاب** oo afar mujallad ka kooban, nuskhada aan haystana lagu daabacay Daaru Al Kutubi Al Cilmiyyah**دار الكتب العلمية** ee Bayruut**بيروت** arliga Lubnaan**لبنان** sanadka kun afar boqol shan iyo toban Hijriga una dhiganta kun sagaal boqol shan iyo sagaashan miilaadiga.
Wuxuu kitaabkiisaan Cadiyyi bin Xaatim**عدي بن حاتم** uga yiri:
"Cadiyyu bin Xaatim Al Dh-dhaa'ii**عدي بن حاتم الطائي** waa Muhaajir**مهاجر** , kuniyadiisuna waa Abaa Dhariif**أبا طريف**, nasabkiisana waxaa la yiri waa

sidatan: Cadiyyu bin Xaatimu bin Cabdu Allaahi bin Sacd bin Al Xasraj bin Imri'u Al Qays bin Cadiyyu bin Rabiicah bin Jarwal bin Thacl bin Camr bin Al Ghawth bin Dhayy'i bin Udud bin Zayd bin Kahlaan **عدي بن حاتم بن عبد الله بن سعد بن الحسرج بن إمرأ القيس بن عدي بن ربيعة بن جرول بن ثعل بن عمرو بن الغوث بن طيئ بن أدد بن زيد بن كهلان\,** waxayse isku khilaafeen qaar ka mid ah magacdiisa gaara Dhayy'i**طيئ**.

Wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid bisha Shacbaan**شعبان** ee sanadka toddobaad ee Hijrida.

Al Waaqidii**الواقدي** wuxuu yiri:
"Cadiyyu bin Xaatim**عدي بن حاتم** wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u yimid bisha Shacbaan**شعبان** ee sanadka tobanaad, warka imaatinkiisa Nabigana, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yaab ayuu leeyahay, kuna sugan yahay Xadiith saxiix ah oo fiyow, uuna Qataadah **قتادة** ka wariyay ibnu Siiriin**إبن سيرين**.

Kaddibna wuxu u yimid Abuu Bakr Al Ssiddiiqu**أبوبكر الصديق** isagoo sida zakada xoolaha tolkiis zamanka riddada, tolkiisna wuxuu ka reebay inay diinta ka noqdaan oo ay isaga kula sugnaadaan islaamka iyo taladiisa fiican.

Wuxuuna ahaa hoggaamiye madax u ah tolkiis, wuxuuna ahaa khadhiib **خطيب** codkar ah oo aftahan ah, jawaabtana iyo hadalkaba isla markiiba hela, sarreeya oo kariim ah.

Waxaa Cadiyyu bin Xaatim**عدي بن حاتم** laga wariyay inuu yiri:
"Salaadi sooma ayan gelin anigoo u hilowsan mooyee."

Khaythamah bin Cabdu Al Rraxmaanu**خيثمة بن عبد الرحمن** wuxuu ka wariyay Cadiyyu bin Xaatim**عدي بن حاتم** inuu yiri:
"ma ayan dhicin inaan Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, usoo galo ee waa illaa kan meel aan fariisto ii banneeya ama uu jirkiisu ii dhaqaaqo. Maalin ayaan waxaan ugu soo galay gurigiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayagoo ay asxaabtiisu buuxiyeen, markaasuu iga durkay oo aan dhiniciisa fariistay."

Waxaa Cadiyyu bin Xaatim**عدي بن حاتم** u yimid gabayaaga Saalim bin Daarah Al Ghadhafaanii**سالم بن دارة الغطفاني\,** magaca aabihiis Daarah-na **دارة** waa Musaafic**مسافع**, markaasuu wuxuu ku yiri:
"ma ku ammaanaa Abaa Dhariifow**أبا طريف**?"
Markaasuu Cadiyyu**عدي** wuxuu ku yiri:
"u kaadi walaalkeeyow, aan marka hore kuu sheego maalkaygu intuu yahay, oo aad markaas igu ammaantid ammaan u dhiganta. Waxaan leeyahay kun sabeenood iyo kun Dirham iyo saddex addoon. Faraskaygaanna wuxuu u xiran yahay jihaadka jidka Ilaahay Cazza wa Jalla**الله عزوجل** oo aan u fuulaa. Marka hadda gabay tiri."

Markaasuu gabay dheer ku ammaanay.

Xadiithka Al Shacbiyyu\الشعبي wuxuu wariyay inuu Cadiyyu bin Xaatim\عدي بن حاتم uu Cumar bin Al Khadh-dhaab\عمر بن الخطاب , markuu u yimid, ku yiri:
"u malayn mayo inaad i taqaanid."
Markaasuu Cumar\عمر wuxuu yiri:
"sidee baanan kuu aqoon, ayadoo zakada ugu horreysey oo wajiga Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, caddaysay (waa uu ku farxay oo raalli ku noqday) ay ahayd zakada Dhayy'i\طيئ?! Waan ku aqaannaa, oo waxaad aamintay markay ayagu gaaloobeen, waxaadna timid markay ayagu jeesteen, waxaadna oofisay markay ayagu khayaaneen!"
Intaasaan uga baxaynnaa warka ibnu Cabdu Al Barri\إبن عبد البر.

Cadiyyu bin Xaatim\عدي بن حاتم

Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu yiri:
"Cadiyy bin Xaatim\عدي بن حاتم wuxuu yiri:
"Ma jiro nin Carab ah oo aniga iga necbaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markaan maqlay. Aniguna waxaan ahaa nin madax ah oo krishtaan ah, tolkayna xoolahay dagaal kusoo furtaan waxaan ku lahaa al mirbaca\المربع oo ah rubuca xoolahaas oo ah marka afar meelood loo qaybiyo meel. Sidaasaan waxaan ku lahaa diin, waxaanna ahaa boqorka tolkay.

Markaasaan markaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, maqlay ayaan nacay.

Markaasaan wiil addoonkayga ahaa oo Carab ah geelana ii raaci jiray ayaan waxaan ku iri:
"Aabe waaye, waxaad iiga diyaarisaa geeleyga awr hayyin ah oo buubuuran, meel ii dhowna ku hay. Markaas haddaad maqashid inuu jayshka Muxammad\محمد, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, cagta soo dhigay arligenna ii soo sheeg."

Markaasuu sidaas yeelay, oo subax ayuu ii yimid, uuna yiri:
"Cadiyyow\عدي, waxaad fali lahayd hadday fardooleyda Muxammad\محمد, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, ku dul yimaadaan fal, oo anigu waxaan araky calammo. Markaasaan wareystay waxaana la yiri:
"Kuwaanu waa ciidanka Muxammad\محمد, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam."
Markaasaan ku iri:
"Hadaba awrtayda ii keen."
Markaasuu keenay oo aan haweenkeyga iyo caruurtayda saaray, aanna is iri:

"waxaan u tegayaa dadkaan isku diinta nahay oo ah krishtaanka Shaam \الشام."
Markaasaan waxaan qaaday dariiqa Al Jawshiyyah\الجوشية (oo uu ibnu Hishaam\إبن هشام yiri: "waa Al Xawshiyyah\الحوشية.").

Waxaanna uga tegey degmadeenna gabar uu Xaatim\حاتم dhalay, waana walaashiis oo Xaatim\حاتم waa isaga aabihiis.

Markaasaan Shaam\الشام imid oo degay. Markaasay fardooleyda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, i daba mareen oo ay ina Xaatim\حاتم qafaasheen oo qafaalkooday ka mid noqotay.

Markaasaa ayadoo ku dhex jirta qafaalka Dhayyi'\طيئ ayaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, loo keenay, ayadoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam gaaray warkayga iyo inaan Shaam\الشام u cararay.

Markaasaa ina Xaatim\بنت حاتم waxaa la geliyay xero qafaalka la gelin jiray oo masjidka albaabkiisa ku taalla. Markaasaa waxaa soo ag maray Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo ay markaas u kacday, waxayna ahayd haweeney edeb fiican leh, waxayna ku tiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aabahay wuu dhintay, midka xilkayga hayayna wuu tegey, ee sii dayn igu mannayso, Ilaahay ha kugu mannaystee."
Wuxuu Sallaa Allaahu calayhi Wasallam yiri:

"ومن وافدك؟"

"Wa man waafiduka?"
oo macnihiisu yahay:

"Waana kee kan xilkaga hayay?"
Waxay tiri:
"Cadiyy bin Xaatim\عدي بن حاتم."
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"الفار من الله ورسوله؟"

"Al faarru mina Allaahi wa RasuuliHi?"
oo macnihiisu yahay:

"Ma midka ka cararay Ilaahay iyo Rasuulkiisaa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam?"
Markaasuu Sallaa Allaau Calayhi Wasallam ka tegey, igana tegey.

Maalinta taas ku xigta ayuu hadana Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam isoo ag maray oo aan intii oo kale ku iri, isaguna intuu shalay yiri oo kale maantana igu yiri.

Markaasuu hadana maalinta taas labaad ku xigtay isoo ag maray anigoo ka quustay.
Markaasuu nin gadaashiisa socda ii tilmaamay:
"Kac oo la hadal!"
Markaasaan u kacay Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam oo aan ku iri:
""Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aabahay wuu dhintay, midka xilkayga hayayna wuu tegey, ee sii dayn igu mannayso, Ilaahay ha kugu mannaystee."
Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu yiri:

"قد فعلت. فلا تعجلي بخروج حتى تجدي من قومك من يكون له ثقة، حتى يبلغك إلى بلادك. ثم آذيني."

"Qad facaltu. Fa laa tacjalii bi khuruujin xattaa tajidii min qawmiki man yakuunu lahu thiqqatun, xattaa yuballighaki ilaa bilaadiki. Thumma aathaniinii."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waa yahay, hana ku degdegin tegiddaada jeer aad ka heshid rag tolkaa ah oo lagu kalsoon yahay oo beledkaaga ku gaarsiiyay. Markaad heshid ii soo sheeg."

Markaasaan waxaan dadka weydiiyay midkuu ahaa ninka ii tilmaamay inaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la hadlo. Waxaana la yiri:
"Waa Calii bin Abii Dhaalib**علي بن أبي طالب**, Allaha raalli ka noqdee."

Sidaasaan ku joogay ilaa u ka yimaado safar u dhashay Baliyy**بلي** ama Qudaacah**قضاعة**, aniguna waxaan rabay inaan walaalkay Shaam**الشام** ugu tago.

Markaasaan Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u imid, aanna iri:
"Rasuulka Ilaahayow, Sallaa allaahu Calayhi Wasallam, waxaa yimid rag tolkay ah oo kalsooni lagu qabo iyo gaarsiinba."

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ii arratiray, gaadiid aan raacana i siiyay, maalna uu i siiyay. Markaasaan safarkaas soo raacay oo aan Shaam**الشام** la imid."

Cadiyy**عدي** wuxuu yiri:
"Wa Allaahi**والله** anigoo gurigayga fadhiya ayaan waxaan arkay haweeney rati saaran oo ii soo socota, markaasaan waxaan iri:
"Tani waa ina Xaatim**حاتم**."
Mase waaba ayadii. Markaasay markay isaoo dul istaagtay ayay i liidday oo tiri:

"Waa midka riximka gooyey oo daallinka ah, oo waxaad soo qaadatay haweenkaaga iyo caruurtaada, waxaadna kasoo tagatay cawrada (waa gabadhee) aabahaa!"

Waxaan iri:

"Walaalay waxaan fiicnayn ha oran, oo wa Allaahi**والله** inaanan cudur daar lahayn, waxaad sheegtayna waan falay."

Markaasay degtay oo ay agteyda iyo gurigeyga ila degtay. Markaasaan waxaan ku iri, waxayna ahayd haweeney fiiro dheer leh iyo go'aanba: "Amarka ninkaanu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, muxuu kula yahay?"

Waxay tiri:

"Waxay ila tahay wa Allaahi**والله** inaad degdeg ugu tagtid, oo hadduu Nabi yahayna kuwa ugu horreeya oo rumayntiisa ugu horreeya waxay leeyihiin deeq ay inta kale dheer yihiin, hadduuse boqor yahay ku dullobi maysid Cizziga Yaman**عز اليمن**, adigoo adiga ah."

Waxaan iri:

"Wa Allaahi**والله** taas weeye taladu."

Ciidanka qabiilka Dhayy'i**طيئ** ku duulay waxaa watay Calii bin Abii Dhaalib**علي بن أبي طالب**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuna ka koobnaa boqol iyo konton nin, ujeedada duullaankuna waxay ahayd inuu dumiyo sanam ay caabudi jireen oo la yiraahdo Al Fulsa**فلس**, oo uu markaas dumiyay. Qafaalkuu soo qafaalayna waxaa ka mid ahayd Saffaanah bintu Xaatim**صفانة بنت حاتم** oo la dhalatay Cadiyyu bin Xaatim **عدي بن حاتم** oo xagga Shaam**الشام** u cararary. Duullaankaasna wuxuu ahaa bisha Rabiicu Al Aakhar**ربيع الآخر** ee sanadka sagaalaad ee Hijrada, siduu u wariyay Adhlasu Al Siirati Al Nabawiyyati**أطلس السيرة النبوية** ee Dr. Shawqii abuu Khaliil**د\شوقي أبوخليل** bogga laba boqol laba iyo toban.

Islaamidda Cadiyyu bin Xaatim\عدي بن حاتم

Markaasaan soo dhaqaaqay oo aan Rasuulka Ilaahay, Sllaa Allaahu Calayhi Wasalllam, Al Madiinah**المدينة** ugu imid, oo aan usoo galay isagoo masjidkiisa ku dhex jira oo aan salaamay. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"من الرجل؟"

"Mani al rrajulu?"

oo macnihiisu yahay:

"Kumaad tahay?"

Waxaan iri:

"Cadiyy bin Xaatim**عدي بن حاتم** ."

Markaasuu Rasuulka Ilaahy, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, soo kacay oo uu xagga gurigiisa ila aaday, oo wa Allahi\والله isagoo ila sii socda ayaa waxaa ka hortimid haweeney taag daran oo da' awyn oo istaajisay. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam waqti dheer la taagnaa, ayaduna ay amarkeeda kala hadlaysay.

Markaasaan waxaan naftayda iska iri:
"Wa Allaahi والله inuusan kani boqor ahayn."

Kaddibna wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Clayhi Wasallam ii waday gurigiis oo i geliyay. Markaasuu wuxuu soo qaaday barkin harag ah oo caleemaha timirta laga buuxiyay oo uu ii soo tuuray, uuna yir:

"اجلس على هذه."

"ajlis calaa haathihi",
oo macnihiisu yahay:

"Middaan ku fariiso."
Waxaan iri:
"Bal adigu ku fariiso."
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"بل أنت."

"Bal anta",
oo ah:

"Bal adigu ku fariiso".

Rasuulka Ilaahyna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam dhulkuu fariistay. Markaasaan naftayda waxaan iska iri:
"Wa Allaahi والله inuusan kani boqor ahayn wuxuu boqor sameeyo."

Kaddibna wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"إيه يا عدي بن حاتم! ألم تكن ركوزيا؟"

"iih yaa Cadiyyu bin Xaatim! Alam takun rakuuziyyan?"
Oo macnihiisu yahay:

"Cadiyy bin Xaatimow\عدي بن حاتم! Soo ma ihid nin diinta rakuuziyyah \ركوزية ku jira?"
Waxaan iri:
"Haa."
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"أولم تكن تسير في قومك المرباع؟"

"Awalam takun tusiiru fii qawmika al mirbaaci?"
oo macnihiisu yahay:

"oo soo tolkaa kama qaadatid rubuca xoolahay soo furtaan?"
Waxaan iri:
"Haa."
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"فإن ذلك لم يكن يحل في دينك."

"fa inna thalika lam yakun yuxillu fii diinika",
oo macnihiisu yahay:

"hadaba kaasu diintaada xalaal kuuguma aha inaad qaadatid."
Waxaan iri:
"Haa wa Allaahi**والله**, iiguma aha."

Markaasaan waxaan ogaaday inuu Nabi Mursal ah oo lasoo diray yahay oo uu ogyahay wuxuu dadku jaahil ka yahay.
Kaddibna wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"لعلك يا عدي إنما يمنعك من الدخول في هذا الدين ما ترى من حاجتهم. فوالله ليوشكن المال أن يفيض فيهم حتى لا يوجد من يأخذها. ولعلك إنما يمنعك من دخول فيه ما ترى من كثرة عدوهم وقلة عددهم. فوالله ليوشكن أن تسمع بالمرأة تخرج من القادسية على بعيرها تزور هذا البيت، لا تخاف. ولعلك إنما يمنعك من دخول فيه أنك ترى أن الملك والسلطان في غيرهم. وأيم الله ليوشكن أن تسمع بالقصور البيض من أرض بابل قد فتحت عليهم."

"lacallaka yaa Cadiyyu innamaa yamnacuka mina al ddukhuuli fii haathaa Al Ddiini maa taraa min xaajatihim. Fa wa Allaahi la yuushikanna al maalu an yafiida fiihim xattaa laa yuujada man ya'khuthahu. Wa lacallaka innamaa yamnacuka min dukhuulin fiihi maa taraa min kathrati caduwwihim wa qillata cadadihim. Fa wa Allaahi layuushikanna an tasmaca bi al amr'ati takhruju mina Al Qaadisiyyati calaa baciirihaa tazuuru haathaa Al Bayti, laa takhaafu. Wa lacallaka innamaa yamnacuka min dukhuulin fiihi annaka taraa anna al mulka wa al ssuldhaana fii ghayrihim. Wa aymu Allaahi la yuushikanna an tasmaca bi al qusuuri al biidi min arli Baabil qad futixat calayhim."
Xadithka macnihiisu waxaa weeye:

"Cadiyyow**عدي** waxaa dhici karta inuu kaa hortaagan yahay gelidda Diintaan waxaad muslimiinta uga jeedid oo danyar nimo ah, laakiin wa Allaahi mar dhow maalkuu dhexdooduu ka burqanayaa oo ku badanayaa

ilaa lagaba waayo qof doonaya oo qaata. Waxaaba dhici karta inay geliddiisa kaa hartaagan tahay waxaad ka aragtid fara badnida cadawgooda iyo ayaga tiro yaridooda. Wa Allaahi**والله** mar dhow waxaad maqli doontaa haweeney Al Qaadisiyyah**القادسية**, oo ah magaalo ku taalla arliga Ciraaq**عراق**, ratigeeda kasoo raacday oo Kacbada u timaadda ama Xajj ama cumro ayadoo aan baqanayn. Waxaaba dhici karta oo kale inay geliddiisa kaa hortaagan tahay inaad u jeedid inay boqortooyadu iyo saldanadu ku jirto muslimiinta ghayrkood. Wa Allaahi**والله** waxaad dhowaan maqli doontaa inay muslimiintu qusuurta cadcad ee arliga Baabil , ee Ciraaq**عراق**, loo furay."

Markaasuu islaamay. Cadiiy**عدي** wuxuu yiri:
"Laba waan arkay oo ay gudbeen, waxaana hartay midda saddexaad, oo wa Allaahi**واللهوالله** ahaanaysa. Waxaan arkay qusuurta cadcad ee Baabil **بابل** oo la furtay. Waxaanna arkay haweeney ratigeeda Al Qaadisiyyah **القادسية** kasoo baxday ayadoo aan axadna ka cabsanayn oo Kacbada usoo xajjiday. Wa Allaahi**والله** tan saddexaadna way ahaan doontaa, oo maalku uu dureerayaa oo badanayaa ilaa lagaba waayo qof raba oo qaata."

Al Idriisii\الإدريسي: magaalada Baraawe

Kitaabka Kitaabu Nuzhatu Al Mushtaaqi fii ikhtiraaqi Al Aafaaqi **نزهة المشتاق في إختراق الآفاق**, waxaa dhigay Abii Cabdu Allaahi Muxammad bin Muxammad bin Cabdu Allaahi bin Idriis Al Xammuudii **Al Xasanii** Al Macruufi bi Al Shariifu Al Idriisii **أبي عبد الله محمد بن محمد بن عبد الله بن إدريس الحمودي الحسني المعروف بالشريف الإدريسي**, waxaana lagu daabacay Maktabatu Al Thaqaafah Al Diiniyyah**مكتبة الثقافة الدينية**, Qaahirah**القاهرة** arliga Masar**مصر**, waana laba mujallad.

Al Idriisii**الإدريسي** wuxuu noolaa inta u dhexeysa sanadyada Hijriga ah ee afar boqol iyo sadex iyo sagaashan iyo shan boqol iyo lixdan, una dhigma kun iyo boqol ilaa kun iyo boqol iyo shan iyo lixdan miilaadiga. Kitaabkaanna wuxuu dhigiddiisa kasoo jeestay sanadka Hijriga ah ee shan boqol iyo sideed iyo afartanka.

Al Idriisii**الإدريسي** waa dhasha Al Xasan bin Faadhimah**الحسن بن فاطمة**, gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuna ku dhashay magaalada Sabtah**سبتة** ee dalka Maghrib**المغرب** ama Morokko, wuxuuna ku koray oo uu wax ku bartay magaalada Qurdhubah**قرطبة** ee dalka Spaaniya ka tirsan.

Al Idriisii**الإدريسي** wuxuu ahaa nin ka mid ah culummada waaweyn ee juqraafiga ku xeel dheeraaday, wuxuuna galay socdaal dheer. Wuxuuna tegey jaziiradda Sicilia, oo maanta dalka talyaaniga ka tirsan, waagaasna ahayd boqortooyo gooni ah. Markaasuu wuxuu ku degay boqorkeeda oo la

oran jiray Ruggero Kan Labaad, wuxuuna u dhigay kitaab uu ku magacaabay Kitaabu Nuzhatu Al Mushtaaqi fii ikhtiraaqi Al Aafaaqi **كتاب نزهة المشتاق في إختراق لبآفاق\,** waana kitaabka ugu saxsan kitaab ay Carabi ka allifto Yurub iyo Italia, uuna mid kasta oo culummada Carabta ah oo galbeed wax ka qora uu ka qaatay. Warkaan al Idriisiina**الإدريسي** waxaan kasoo qaatay kitaabka Al Aclaamu\ **كتاب الأعلام** ee uu dhigay Al Ziriklii **الزركلي**.

Al Idriisii**الإدريسي** wuxuu kitaabkiisaan mujalladka koowaad booggiisa sideed iyo kontonaad ku yiri isagoo tilmaamaya qaybta toddobaad ee adduunkaan iyo Badwaynta Hindiya:
"baddaanu waa Badda Hindiga, waxaana xeebtiisa ku taalla magaalada Baraawe, ayadaana ugu dambeysa arliga gaalada aan waxba aaminasanayn xagga caqiidada. Waxay soo qaataan dhagaxda taagtaagaan markaasay waxay ku dhaashaan saliidda mallayga oo ay markaas u sujuudaan. Cibaadadoodu waa waxaas xun iyo wax la mid ah iyo caqiidadooda faasidka ah, oo taasay korkeeda yihiin oo ku sugan yihiin."
Waa intaas warkaan kasoo qaadannay Al Idriisii**الإدريسي** .
Waxaa warkaas ka cad inay degmada Baraawe jirtay oo la degganaa qiyaas kun sano ka hor, ayna degganaayeen dad aan muslin ahayn oo gaalo ah.

Kitaabu Al Zzunuuji**كتاب الزنوج**

Ninka talyaaniga u dhashay oo la oran jiray Enrico Cerulli, ahaana guddoomiyaha Soomaaliya intay ahayd mustacmarad talyaani, Soomaaliyana joogay markay ku jirtay gumaysiga talyaaniga, wuxuu dhigay kitaabka la yiraahdo "Somalia, scritti vari editi ed inediti, Storia della Somalia, l'Islam in Somalia, Il Libro dei Zengi, primo volume, a cura dell'Amministrazione Fiduciaria Italiana della Somalia", laguna daabacay Istituto Poligrafico dello Stato P.V. Roma kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo konto. Cerulli wuxuu bogga laba boqol iyo kow soddon ee kitaabkiisaas ku sheegay inuu gacantiisa soo galay kitaabka la yiraahdo Kitaabu Al Zunuuji**كتاب الزنوج**. Cerulli wuxuu sheegay inay kitaabkaas laba nuskho ama namuunad ka jiraan oo kala ah mid uu Qaalliga degmada Kismayo ee kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo labaatan lahaa, oo uu isaga laftiisu nuskhad ka helay Madaxa Qaalliyada degmada Muqdisho oo magaciisu ahaa Sheekh Abuu Bakar ibnu Muxyiddiin Mukarram. Nuskhadda labaad waxaa haysay, ayuu yiri, "Professor Alice Werner o igala soo socodsiisay, iina soo marisay Ergada ingiriiska ee Ethiopia…Warka nuskhada kitaabkaan ku dhiganna wuxuu la mid yahay warka aan kutubbada kale ka helnay." Intaas waxaa ku eg warkii Cerulli. Kitaabkaan ah Kitaabu Al Zunuuji**كتاب الزنوج**, o afka Carabiga ku dhigan, wuxuu koobayaa taariikhda Soomaalida, meeshay ka yimaadeen, Carabnimadooda iyo siday Soomaaliya kusoo degeen, dadkii degganaan jirayna ay uga kiciyeen.

Kitaabu Al Zunuuji**كتاب الزنوج** oo aan la magacaabin ninka dhigay, kana kooban sideed iyo toban bog, kuna dhigan afka Carabiga. Kitaabkaas, aan la sheegin ninka dhigay, wuxuu yiri:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi Isagaanna la kaashanaynnaa kitaabkaan Kitaabu Al Zzunuji iyo akhbaartooda ee xeebta galbeed ee Badda Hindiga. Al xamdu li Allaahi Al Khaaliqi Al Baari'i Al Waduudi Thuu Al Fadli wa Al Karami wa Al Juudi Midka khalqigiisa midabyo u yeelay ee caddaan iyo guduud iyo madaw, qaarkoodna qaarka kale wax dheereysiiyey ugana kor mariyay inuu ka dhigay madax iyo hoggaamiyayaal, iyo dhererka iyo nolosha fiican, kuna xukumay midkuu aabihiis habaaray inuu wajigiisu madoobaado dhashiisuna ay u noqoto dhasha labadiisa wiil oo kale addoommo. Wa Al Ssalaatu wa Al Ssalaamu calaa Al Musdhafaa Al Maxmuudi wa calaa Aalihi wa Asxaabihi kuwa ah ehelka rukuuca iyo sujuudda. Intaas kaddibna.

Waxaan soo gaabinnay akhbaarta zunuujta, (zinji waa jiil ka mid ah dadka madow, oo ah dadka madow oo qaaradda Afrika degah oo sananka bagafsan iyo timahana adag oo jareerta ah leh, siduu Al Rraazii u yiri) ee ku nool daanta galbeed ee Badda Hindiya iyo diillinta adduunka kala barta, oo ah Eqwaatooraha, annagoo caddeyneynna wuxuu Ilaahay ku abuuray oo zunuujta ah oo ku noolaa Jubba oo afka Carabiga ah oo asliga ah Kashuur lagu yiraahdo, afka sawaaxiligana lagu yiraahdo Wanyika. Sidoo kale akhbaarta Carabta yimid beledka zunuujta, oo beledka camiray oo degay iyo degmooyinka iyo tuulooyinkaba, degeyna laga soo bilaabo zamanka jaahiliyada, kuna yimid talada boqorka Tubbac Al Ximyarii Al Akbar**تبع الحميري الاكبر** .

Hijrada Carabta ee zamanka Tubbac Al Ximyarii**تبع الحميري**

Markaasey markay Carabtu ka timid Sancada Yaman**صنعاء اليمن** ku taalla, waana qawmka boqorka Tubbac Al Ximyarii**تبع الحميري** , taasoo ahayd zamanka jaahiliyada siduu tafsiirkiisa ugu xusay Qataadah**قتادة** ee Aayadda:

أَهُمْ خَيْرٌ أَمْ قَوْمُ تُبَّعٍ(37)

"Ahum khayrun ama qawmu Tubbacin(37)**"**
ahna Aayadda toddoba iyo soddonaad ee Suuratu Al Dukhaan**سورة الدخان** oo macneheedu yahay:

"Ma ayagaa khayr badan ama qawmka Tubbac**تبع?(**37)" ayuu Qataadah **قتادة** wuxuu yiri:
"Waa Tubbac Al Ximyarii**تبع الحميري**", oo ciidammadiisa watay socdayna ilaa uu ka kharaabiyo oo burburiyo Al Xiirah**الحيرة** (oo ku taalla Ciraaq**عراق**), uuna ka dhisay Samarqand**سمرقند** (oo maanta dalka

Uzbekistan ku taalla ee Bariga qaaradda Aasiya). Wuxuuna ka mid ahaa boqorrada Yaman**اليمن**.

Abuu Xaatim**أبوحاتم** wuxuu Al Rafaashii**الرفاشي** ka wariyay inuu yiri: "Wuxuu Abuu Kulab Ascadii Al Ximyarii**أبوكلب أسعدي الحميري** ka mid ahaa Tubaabicada**التبابعة** boqorrada Yaman**يمن**, wuuna aaminay Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi wasallam, wuxuuna boqor ahaa konton sano sida ugu xusan kitaabka Sabaa'iku Al Th-thahabi**سبائك الذهب**. Aayaddu waxaa daliil u tahay inuu Tubbac Al Ximyarii**تيع الحميري** noolaa zamanka Nabi Muuse Calayhissalaamu, waxaana u daliil ah Aayadda taas aan soo sheegnay oo Tubbac**تيع** xusaysa ka horreysa oraneysana:

وَلَقَدْ نَجَّيْنَا بَنِي إِسْرَائِيلَ مِنَ الْعَذَابِ الْمُهِينِ (30) مِنْ فِرْعَوْنَ إِنَّهُ كَانَ عَالِيًا مِنَ الْمُسْرِفِينَ (31) وَلَقَدِ اخْتَرْنَاهُمْ عَلَى عِلْمٍ عَلَى الْعَالَمِينَ (32)

"Wa laqad najjaynaa Bani Israa'iila mina al cathaabi al muhiini(30) **min Fircawna innahu kaana caaliyan mmina al musrifiina**(31) **wa laqad ikhtarnaahum calaa al caalamiina**(32)**."**
Waana Aayadaha soddon ilaa laba iyo soddon ee Suuratu Al Dukhaan **سورة الدخان** oo macnehoodu yahay:

"Waxaan reer Bani Israa'iil**بني إسرائيل** ka badbaadinnay cathaab wax dulleeya(30)Waxaan ka korinnay Fircoon, wuxuuna ahaa mid isla weyn oo kuwa xad gudba ka mid ah(31)Banii Israa'iilna**بني إسرائيل** waxaan ka doorannay dadka waqtigooda joogay annagoo u cilmi leh(32)". Waxaana hubaal inaan doorannay macneheedu waxaa weeye "Waxaan doorannay Muuse**موسى** iyo Banii Israa'iil**بني إسرائيل**."

Waxayna degeen oo cammireen Muqdisho reer Tubbac**تبع**, waana magaalada ugu horreysey oo ay degaan. Kaddibna waxay degeen Busaasah**بساسة**, oo asalkeedu Carab yahay, looguna bixiyey Busaasah **بساسة** ayadoo ay dadka degah ka yimaadeen Al Xijaaz**الحجاز**, laguna khasbay inay dalkooda kasoo tagaan. Markaasey Kuniyada Makkah Al Mukarramah**مكة المكرمة** u bixiyeen, siduu shaacirku u yiri:

بساسة هي كنية أم القرى سم بها أهل الحجاز مقاما

"Busaasah hiya kuniyyatu Ummi Al Quraa samma bihaa ahla Al Xijaazi muqaaman"
oo macneheedu yahay:

"Busaasah**بساسة** waa kuniyada, waana koofaarta, Ummu Al Quraa**أم القرى**, oo ah Makkah Al Mukarramah**مكة المكرمة**, waxaana ku magacaabay dadka Xijaaz**الحجاز** ka yimid oo degay."

(Busaasah**بساسة** waxaa la oran jiray magaalada Soomaaliya ku taalla oo maanta Boosaaso la yiraahdo iyo magaalada dalka Kenya ku taalla oo ayadana Busaasah**بساسة** la oran jiray kaddibna Mumbaasa loo bixiyay).

Tubbac Al Ximyarii**تبع الحميري** wuxuu kaloo dhisay Kilwaa, kaddibna Patee iyo Siiwii, Aamu iyo Ghaamaa. Ghaamaa waxay ahayd magaalo ku taalla jaziirad u dhexeysa Kilifi iyo wabiga Taana, hadana waxaa la yiraahdaa Ghamiini. Waxayna ahaan jirtay jaziirad camiran oo dhsimaha guryeheedu adag yahay laguna adkeeyey dhagax iyo nuuriyad. Badda ayaana burburisay oo xoogaa xoogaa uga goosatay. Markaasey dadkeeda biyuhu ka go'een. Markaasey waxay u guureen Ozi. Markaasey guryeheedu badda galeen, haddana waxaa baddaas loo yaqaanna Badda Ghaamaa lehna hirar aad u waaweyn oo laga cabsado. Qofka doon saaranna hadday halkaas la timaaddo wuu arkayaa dhismaha guryaha darbiyadooda iyo darbiga ku wareegsanba. Markaasuu dhagaxdeeda halkaas ka gurtaa si uu ugu gato suuqyada Maliindi iyo Mambruy markay tahay waqtiga Al Artab oo ah markay socoto dabayshi munsuunka waqooyi/bari. Tubbac Al Ximyarii**تبع الحميري** wuxuu doonayey wuxuu ahaa dahab. Markaasuu dahab qoday, wuxuuna helay wuxuu helay.

Kaddibna Carabtu way faaftay oo kala tageen ayna degeen inta u dhexeysa Muqdisho iyo Mumbaasah, Markah iyo Baraawe.

Markaasey markay Carabtu gaartay Jubba, ayna zunuujtu ka carareen ayay kuwaas carary waxay ku magacaabeen Kashuur**كشور** oo macnihiisu yahay kan cararay.

Kaddibna Carabtu waxay ku dadaaleen la kulankooda, waxayna la kulmeen laba bilood kaddib. Markaasey u arra tireen ayna wax la bixiyo oo kala duwan siiyeen. Markaasey cabsiday qabeen ka tagtay ayna dhexdooda ka abuurantay xiriir wanaagsan. Markaasey zunuujtu Carabta jeclaadeen jeceyl aan ilaa haddeer ka tegin.

Carabtuna markaas waxay ahaayeen gaalo oo axkaamta zunuujta kama ayan hor imaan. Kaddibna waxay Carbtu degtay inta u dhexeysa Jubba iyo Mumbaasah iyo Kisimaayo oo dadkeedu Masar ka**مصر** yimid beled la yiraahdo Baanah**بانة,** waana Baajuunta. Kaddibna Carabtu waxay degeen Faazah iyo Siiwi oo dadkeedu Cumaan**عمان** ka yimaadeen. Waxaana halkaas ku yaalla gacan ilaa maantana ay ku taallo magaalo la yiraahdo Siiwi dadkeeduna yahay Banuu Sacd**بنوسعد**.

Kaddibna waxay degeen Patee, waxaana degay dad ka yimid Al Shaam **الشام**. Aamu waxaa degay dad ka yimdi Ciraaq**عراق**, gaar ahaan Al Kuufah**الكوفة**.
Sidoo kale dadka dega Malindi waxay ayaguna ka yimaadeen Al Kuufah **الكوفة** ee Ciraaq**عراق**.

Degmada Yuumbu ayaduna waa Carabiyad sababtuna tahay inay dadka deggani Yaman**يمن** ka yimaadeen degmada Yuum**يوم** ee Yaman**يمن** ku taalla. Degmada Kilfii magaceedu waa magaca qabiil ku abtirsata Caamir bin Al Xaarith**عامر بن الحارث**.

Degmada Al Madhaafii waxaa degay dad ka yimid Al Dhaa'if**الطائف**. Dadka Mumbaasah degana waxay ka yimaadeen Al Xijaaz**الحجاز** sidaan hore usoo sheegnay, qaarkoodna waxay ka yimaadeen Cumaan**عمان** una dhasheen qabiilka Julandaanii**الجلنداني**, waana kuwa la yiraahdo sida qalad weyn ah kilindiini, ayagoo ah dhasha Julandu bin Karkarah**الجلند بن كركرة** oo ay ku abtirsadaan Julandaanii**جلنداني** qabiil Cumaan**عمان** degta oo ilaa haddeer jooga.

Dadka Mumbaasah degah qaarkoodna waxay ka yimaadeen Yaman**يمن** iyo Al Jawf**الجوف**, waana Al Taghmaa**التغما** qabiil ka tirsan Mahrah**مهرة** ibnu Xaydaan**حيدان**, qofka ku abtirsadana la yiraahdo Al Taghmaawii oo khilaaf la'aan Carab ah.

Al Jawf**الجوف** waxaa la yiraahdaa gobolka u dhexeeya Casiir**عصير** iyo Sancaa'**صنعاء** ee arliga Yaman**يمن**, kumana gooni ah qabiil keligiis ee waa qabaa'il kala duwan.

Degmada Dhiiwii waa Carabiyad asalkeedu, dadka degana waxay ka yimaadeen Dhiiwii iyo Fanj ee arliga Cumaan**عمان**.

Degmada Waasiin ayaduna waa Carabiyad asalka macneheeduna waa "kuwa tiiraanyeysan" ayadoo uu dadka dega Fanj ay halkaas dadka ku xabbisi jireen.

Markaasaa waxaa arligaas ka dhacay daacuun iyo cudurro kala duwan. Markaasaa waxaa kharaabay oo burburay magaalooyinka iyo tuulooyinka iyo degmooyinka qaarkood. Inta kalena ilaa maanta ayay jiraan.

Carabtuna waxay degeen xeebta Badda Hindiga, waxayna badankoodu ku imaan jireen doonyo, qaar kalena barriga. Carabtuna waxay u imaan jireen sababta xarbiyada, kana imaan jireen xagga Sawaakin iyo Barbarah. Markaasay xiddiga Al Qudhb**القطب** xagga koofureed usoo raacaan ayagoo dhabarradoodana xijinaya waqooyiga. Markaasey hoos ugu degayaan Muqdisho iyo ghayrkeedba. Caadada zinjigu waxay waayahaas ahayd inay muraadkooda ka dhammaystaan abaankooda, oo zinji walba wuxuu lahaa abaan zinji ah, oo abaanku waa ninka kan kale magan geliya oo uu geeskiisa magaalada ku daaqo. Markaasuu markuu nin Carab ahi magaalada zinjiga yimaado wuxuu ku hoos jirayaa magan gelyada iyo ilaalinta abaankiisa iyo qabiilka abaankiisa hadduu axad kale oo zinji ah wax la doono.

Sidoo kalena Carabtu waxay zinjiga ka magan gelin jireen oo ka ilaalin jireen umuurta xarbiga iyo ghayrkoodba. Hadduu Carabku dayn ka qaato

kashuurka, uuna ka maqnaado, zinjigu wuxuu ka qaadan jiray maalka nin kaloo Carab ah, uuna u sheegayaa:
"hebel ina hebel ayaa halkaan joogay wuuna naga safray, waxaana lagu leeyahay intaas iyo intaas. Marka maalkaagaanu wuxuu ku xiran ninkaas. Marka ninka noo soo celi si aan maalka lagu leeyahay uga oofsanno, oo aan adiga sidaas kuula wadaagno."

Kitaabka Saaxilu Sharqi Ifriiqiyah\ساحل شرق افريقية

Kitaabka la yirahdo Saaxilu Sharqi Ifriiqiyah min Fajri al Islaami xattaa al Ghazwu al Burtuqaalii\ساحل شرق افريقية من فجر الإسلام حتى الغزو البرتقالي , oo macnihiisu yahay "xeebta bariga Afrika laga bilaabo waabariga bilowga islaamka ilaa weerarka burtuqiiska", waxaa dhigay Doktoor Muxammad Maxmuud Al Xuwayrii\د\محمد محمود الحويري, waxaana daabacday Daru Al Macaarif\دار المعرفة ee dalka Masar\مصر sanadka kun sagaal boqol toddoba iyo sideetanka oo u dhiganta kun afar boqol iyo lix Hijriga. Dr. Muxammad\د\محمد wuxuu bogga saddex iyo labaatan ku yiri:

"waxaa xeebta Afrikada Bari soo degay markuu sanadku ahaa boqol laba iyo labaatan Hijriga (waana mar hadda laga joogo in ka badan kun iyo saddex boqol oo sano) koox shiico\شيعة ah oo kasoo cararay Amiiru Al Mu'miniina Hishaam bin Cabdu Al Malik\أمير المؤمنين هشام بن عبد الملك oo cadaadiyay shiicada\الشيعة, waxayna degeen beesha la yiraahdo Shungwaya oo xeebta ah una dhow Muqdisho, si degdeg ahna waxay u yeelatay awood iyo xoog.

Qaxootigaasu sidiisuu xooggiisa iyo awooddiisa dawladnimo xeebta ugu lahaa ilaa ay sanadka laba boqol afar iyo toddobaatan Hijriga ah una dhiganta sideed boqol toddoba iyo sideetan miilaadiga ay ugu timid oo ugu soo biirtay jamaaco Carab ah oo math-habkoodu Sunni yahay, aadna u tiro badan, asalkoodana ka yimid magaalo u dhow oo daris la ah Al Axsaa'a\الأحساء (Hajr\هجر waxay ahaan jirtay magaalo madaxda arliga la yiraahdo Baxrayn\بحرين. Waxaa kaloo la yiri Baxrayn\بحرين o idil ayaa Hajr \هجر la oran jiray, waxayna ku tiillay Gacanka Carabta oo ay hadaba Baxrayn\بحرين ku taallo. Maantana waxaa la yiraahdaa, ayuu Dr. Abuu Khaliil Shawqii\د\أبوخليل شوقي yiri, Al Axsaa'a\الأحساء.
Af ahaanna Hajr\هجر waxaa la yiraahda dabarka awrta lagu dabro si ayan u cararin) ee Khaliijka Carabta, oo saarnaa saddex doon, ayna hoggaaminayeen toddoba nin oo walaalo ah, kana soo cararay dulmiga xaakinka Al Axsaa'a\الأحساء (oo shiico\شيعة ahaa). Markaasay jamaacadaas sunniga ahi waxay degtay oo ku xasishay Muqdisho iyo Baraawe, labadaanoo noqday caasimadaha dawlad wayn, kartayna inay ku duusho dhammaan xeebta badda oo idil ilaa Mumbaasa xagga koofureed. Shiicadii Zaydiyada\الشيعة الزيدية ahaydna way diideen xukunka dawladdaas inay hoos yimaadaan markaasay waxay u guureen dalka gudihiisa waxayna ku qasmeen dadka arligaas deggan, waxayna noqdeen ganacsato iyo gaddislay badeecadaha xeebta usoo dira.

Kolonel Rigby wuxuu rumaysan yahay inay jamaacadaaas sunniga ah oo Al Axsaa'a**الأحساء** kasoo guurtay ay u dhalatay qabiilka Carbeed ee Al Xaarith**الحارث**, oo waxaa la og yahay inay degeen Zanjibaar sanadka saddex boqol laba iyo toban Hijriga una dhiganta sagaal boqol afar iyo labaatan miilaadiga."

Kaddib wuxuu bogga boqol iyo afar ku yiri:
"Baraawe: magaalada Baraawe waxay ku taalla xeebta Badda Banaadir, koofurta Muqdisho..waxay ahayd degmo Carbeed oo muhim ah markay burtuqiisku soo gaareen, mana uusan xukumin boqor ama suldaan, waxaase xukumay koox madaxdooda waawayn ah oo ganacsato ahaa. Waxaana xusid mudan inuu ustaad Cerulli helay naqash uu ku dhigan yahay afka Carabiga dhimashada mid ka mid ah muslimiinta magaalada deggan sanadka kun boqol iyo afar-kun boqol iyo shan miilaadiga ah (waana mar hadda laga joogo kun iyo saddex sano).

Taasu waxay adkayneysaa inay muslimiin ku noolaayeen magaaladaas, gaar ahaan marka la tix geliyo inuu qabiilka Al Xaarith/**الحارث** ee reer Cummaan**عمان** sheegeyso inay degtay oo guryo ka dhisatay Muqdisho iyo Baraawe tan iyo sanadka sagaal boqol afar iyo labaatan miilaadiga ah oo u dhiganta saddex boqol laba iyo toban Hijriga.

Qiyaas qarniga saddex iyo tobnaad ee miilaadiga waxay Muqdisho iyo Marka iyo Baraawe noqdeen xarumo ganacsi oo muslim ah oo muhim ah, ayna degeen ganacsato badan oo Carab iyo iiraaniyiin ah (tusaale ahaan degmada Gandarshe oo u dhexeysa Muqdisho iyo Marka magaceedu waa afka iiraan oo macnihiisu yahay "beerta boqorka", ayadoo, sida la ii sheegay ay dalmareenka ganacasatada ah ee iiraan ay markay Afrikada bari muusinka usoo socdaan ay halkaas degi jireen, oo ay guryo ka dhisteen, kana guursadeen, sii socod iyo soo laabashaba) ..reer Baraawe waxay kaloo degaan Muqdisho iyo Marka iyo Afgoi, waxaana ka muuqda dhiigga Carabta ilaa heer sare. Waxaana raajix ah inay yihiin dhasha Carabta ka haajiray tan iyo dhawr qarni ka hor koofurta Jaziiradda Carabta kuna xasilay oo magan ka helay Baraawe. Intooda badanna waxay ka shaqeeyaan ganacsiga iyo kalluumaysiga, waxayna ku hadlaan lahjada sawaaxiliga oo loo yaqaanno "xamraanii."

Reer Baraawe

Al Sheekhu Cabdu Al Raxmaan Al Najjaar**الشيخ عبد الرحمن النجار** wuxuu ahaa Guddoomiyaha Bicthada Azharka**بعثة الأزهر** ee Soomaaliya iyo Agaasimaha iyo Sheekha Machadka Diinta islaamka**معهد الدراسات الإسلامية** laga baran jiray oo magaciisu ahaa "Machadu al daraasaati al islaamiyyah" oo raacsanaa Jaamatu Al Azhar**جامعة الأزهر** ee Al Qaahira**القاهرة** arliga Masar**مصر**, inta u dhexeysay sanadka kun sagaal boqol toddoba iyo konton ilaa kun sagaal boqol saddex iyo lixdanka.

Sheekhu wuxuu allifay kitaabkiisa Al Islaamu fii Al Suumaali **الإسلام في الصومال** ee ay daabacday Jamhuuriyatu Misr Al Carabiyyah, Al Majlisu Al Aclaa lilshu'uuni Al Islaamiyyah, Lajnatu Al Tacriifi bi Al Islaami **جمهورية مصر العربية، المجلس الأعلى للشؤون الإسلامية، لجنة التعريف بالإسلام** bisha Rajab **رجب** ee kun iyo saddex boqol iyo saddex iyo sagaashan, una dhigantah Agoosto ee kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo toddobaatanka, waana kitaabka tirsigiisu yahay sagaal iyo toddobaatan. Daabiciddana waxaa kormeere ka ahaa Muxammad Tawfiiq Cuwaydah**\محمد توفيق عويضة.** Sheekhu wuxuu bogga labo iyo lixdan ku yiri:

"Soomaaliaya wuxuu islaamku gaaray intuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, noolaa, markuu kasoo baxay Jacfar bin Abii Dhaalib**جعفر بن أبي طالب** Makkah**مكة**, uuna soo aaday Al Xabashah **\الحبشة**, hijrada kuway gaaladu dhibeen iyo fidinta dacwada islaamka.

Waxay soo gooyeen Badda Cas ayagoo soo maray Baabu Al Mandab باب المندب\, una socda al xabashah, waxaana dhici karta inay ku degeen ayaamo arliga Soomaaliya markay usii socdeen al xabashah iyo markay kasoo laabteenba. Caqli galna ma aha inay Carab muslimiin ah ay arliga Soomaaliya soo maraan sii socod iyoo soo socodba ayadoo uusan axad soomaali ihi islaamka wax ka ogaan, waliba haddii la tixgeliyo inayan Carabta muhaajiriinta ahi u imaan beeshaan ganacsi ama dalxiis, ayse u yimaadeen ayagoo sida Diinta daraadeed loo dhibaateeyey, ahna Diinta Tawxiidka iyo walaaltinnimada iyo sinnaantaba.

Marka, laabudda waa kuwa dadka soomaalida ah kala sheekeystay Diintaan: sidaas ayay Soomaaliya waxay ku ahaaneysaa miduu islaamku galay bilowgiisaba, uuna gaarayba sideed sano ka hor intuusan gaarin Al Madiinah**\المدينة".**

Sheekhu wuxuu warkaasna kasoo qaatay Kitaabka la yiraahdo Al Suumaal qadiiman wa xadiithan**\الصومال قديما وحديثا** uuna dhigay Al Istaathu Xamdii Al Sayyid Saalim**\الأستاذ حمدي السيد سالم,** juzkiisa koowaad.

Sheekhoo hadalkiisa sii watana wuxuu yiri:
"Aniguna waxaan u jalleecaa aragtidaan. Inay sidaas tahayna waxaa u daliil ah inay soomaalidu yihiin kuwa dadka ugu xamaso badan Diinta Islaamka iyo fidintiisaba, waxayna islaameen waagii ugu horreeyey, waana muslimiin boqolkiiba boqol. Siday ugu dheggan yihiin Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa si ka sarreysa in la tilmaami karo. Tusaale ahaan marka magaca RasuuIka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lagu soo qaado khudbo ama darsiba makaankoo idil wuxuu la gariirayaa ku sallintiisa iyo salaamiddiisa." Intaas ayaan warka sheekhaas uga baxaynnaa markaan.

Wargayska “Al Muslimuuna\المسلمون”

Wargeyska la yiraahdo Al Muslimuuna**المسلمون**, oo kasoo bixi jiray dalka boqortooyada Sucuudigana, tirsigiisa soo baxay maalinta jumcada ah ee toddobada bisha Rabiicu Al Awwal**ربيع الأول** ee sanadka kun iyo afar boqol iyo sideed iyo toban, una dhigantah kow iyo tobanka luulyo ee kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo sagaashanka, wuxuu booggiisa tobanaad ku daabacay maqaalad dheer oo uu dhigay Yuusuf Cabdu Al Raxmaan Shaykh oo ay warkeeda ka mid tahay:

"Harar iyo Zaylac waxay islaamka galeen oo ay ku islaameen gacanta Amiiru Al Mu'miniina Cuthmaan bin Caffaan**أمير المؤمنين عثمان بن عفان** iyo haweentiisa Ruqayyah bintu Rasuuli Allaahi**رقية بنت رسول الله**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayna labadooda la socdaan afar iyo toban muhaajir sanadka lix boqol iyo shan iyo toban, taasoo Hijrada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Yathrib**يثرب** sideed sano ka horreysey. Waxay muhaajiriintu joogeen Zaylac iyo Harar afar bilood: Rajab**رجب** iyo Shacbaan**شعبان** iyo Ramadaan**رمضان** iyo Shawwaal**شوال** . Kaddibna waxay u laabteen Makkah Al Mukarramah**مكة المكرمة**, kaddib markay maqleen inay Qurayshi**قريش** islaamtay.
Markay Makkah Al Mukarramah**مكة المكرمة** usoo laabteenna waxay arkeen inuusan warkuu sax ahayn. Markaasey hadana al xabashah isla sanadkaasba usoo haajireen, ayadoo uu madax u yahay Jacfar bin Abii Dhaalib**جعفر بن أبي طالب**, oo ay tobannaano muhaajiriin abi la socdaan."
Waa intaas warkaan wargayska kasoo qaadannay.

Kaddib Al Sheekhu Cabdu Al Raxmaan Al Najjaar**الشيخ عبد الرحمن بن النجار** wuxuu bogga shan iyo lixdan ku yiri:

"xarumaha islaamka ah oo ka qayb qaatay fidinta Diinta islaamka waxaa ka mid ah magaalada Baraawe oo ay Carabtu aasaaseen ayada iyo Muqdisho quruunta koowaad ee Hijrada, waxayna ku taalla xeebta Badweynta Hindiya. Waxaa magaaladaas usoo haajiray oo degay jamaaco u dhashay qabiilka Xaatim Al Dh-dhaa'ii**حاتم الطائي**, halkaasna yimid sanadka sagaal boqol ee Hijrada, oo magaalada camirtay masjidyana ka dhistay lagu cibaadaysto, una kacay ku fidinta dacwada beelaha la dariska ah, uguna kacay si balaaaran. Dadka cilmiga doonayana ayagay gobollada kale uga imaan jireen kaddibna ay ku dhaqaaqi jireen fidinta Diinta islaamka"
Intaas ayaan uga baxaynnaa warka Sheekhaan.

Kutubbo kale oo ay rag gaalo yurub ah dhigeenna waxaan ku arkay sidaasoo kale inay leeyihiin inay dadka Reer Baraawe la yiraahdo yihiin dhasha ka farcantay Cadiyyu bin Xaatim Al Dh-dhaa'ii**عدي بن حاتم الطائي** ama aabihiis Xaatim Al Dh-dhaa'ii**حاتم الطائي** . Runtana Rabbi ayaa og.

Wargayska Al Xayaat\الحياة

Wargayska afka Carabiga kusoo baxa oo la yiraahdo Al Xayaat\الحياة tirsigiisa soo baxay maalinta jimacaha ah ee bisha Maajo ay tahay kun sagaal boqol afar iyo sagaashanka una dhiganta shan iyo labaatanka bisha Thuu Al Qacdah\ذوالقعدة ee sanadka kun afar boqol afar iyo toban Hijriga, tirsigiisuna yahay kow iyo toban kun afar boqol iyo labo, wuxuu boggiisa laba iyo labaatan ku qoray maqaalo ka hadlaysa markay burtuqiisku yimaadeen bariga Afrika qarniga shan iyo tobnaad oo ay burburiyeen xadaarada faca wayn ee Carabiga islaamiga ah. Maqaaladaas waxaa qoray Amiin Tawqfiiq Al Dhiibii\أمين توفيق الطيبي oo macallin ka ah jaamacadda Oxford ee arliga ingiriiska, wuxuuna yiri:

"Qaybta koowaad ee daraasaddaan waxaan uga hadalnay (wuxuuna uga hadlay isla wargayskaas cadadkiisa soo baxay maalinta taas ka horreysay oo khamiista ahayd bishuna shan ahayd) degidda Carabta ee bariga Afrika Bicthada\البعثة islaamka horteed iyo dabadeedba.

Maantana waxaa sii wadaynna siduu xukunka Carabta-Ifriiqigu ugu kordhay gobolkaas, iyo magaalooyinka halkaas ka dhismay iyo xiriirka ganacsi iyo thaqaafada oo dhinac socotay.

Dhammaatka qarniga lix iyo tobanaad waxaa magaalada Bataa oo ku taalla xeebta Kenya ee waqooyi soo gaaray koox badan oo Carab ah oo la yiraahdo Xaatimii\حاتمي oo ka yimid magaalada Baraawe oo ku taalla xeebta koofureed ee Soomaaliya. Halkaas ayayna degeen.

Dadkaan cusub oo soo degay waxay sheegeen inay asalkooda ka yimaadeen Al Andalus\الأندلس (oo ah dalka maanta Spaaniyaa la yiraahdo). Koox ayaga ka mid ahna waxaa asaaseen magaalada Daaru Al Salaamu دار السلام\ caasimadda Tanzaniya (ayagaana magaca u bixiyay).

Kitaabka la yiraahdo "Taariikhu Madiinati Bataa\تاريخ مدينة باتا" wuxuu dhigay in markay ahayd qiyaas sagaal boqol shan iyo sagaashan Hijriga, una dhiganta kun shan boqol toddoba iyo sideetan miilaadiga ay magaalada Bataa yimaadeen dad qariib ah oo ka yimid magaalada Baraawe ee Soomaaliya ku taalla, ahna Carab qabiilkooduna yahay Xaatimii\حاتمي oo ah qabiil Jaziirada Carabta caan ku ah oo laga yaqaanno, wadankooda horena uu ahaa Al Andalus\الأندلس. Carabta xeebaha degana waxay la nasab yihiin oo isku qabiil yihiin kuwaas Al Andalus\الأندلس . ka yimid.

"Taariikhu Madiinati Bataa\تاريخ مدينة باتا" wuxuu intaas ku daray inay Carabtaas reer Andalus\الأندلس ah wateen maal aad u fara badan oo u suurta gelisay inay gataan guryo iyo beero iyo ceelal, oo ay markaas magaalada Bataa ku barwaaqowday si wayn ilaa sanadka kun iyo toban ee

Hijriga, una dhiganta kun lix boqol toban miilaadiga, markaasoo ay bilawdeen dagaallada lala galay burtuqiiska."
Waa intaas warkaan wargayskaas kasoo qaadannay.

Sababta ay Carabta Xaatimiga\حاتمي ah iyo Carab badan oo kale uga soo qaxeen Spaaniya waxay ahayd inuu dalkaasu sideed boqol oo sano ahaa dawlad islaam ah oo ka mid ahaa dawladda islaamka oo ayan qorraxdu ka dhicin (oo halkaasuu ingiriisku kasoo xaday hadalkaas inuu yiraahdo inayan bqoortooyadiisa qorraxdu ka dhicin. Qofka ugu horreeyey oo warkaas yiraahdana wuxuu ahaa khaliifka caasimaddiisu ahayd Dimishaq \دمشق ee arliga Suuriya\سورية oo yiri:

"dawladdayda qorraxdu kama dhacdo oo meel kastoo ay ku taallaba kharaajkeeda ayaa la ii keenaya", waana wax canshuurta u dhigma oo kale.).

Markaasay markay ahayd sanadka miilaadiga ah ee kun afar boqol laba iyo sagaashan ayaa dawladda islaamku burburtay, kaddib markay khilaafaad daakhili ah ku bateen, oo ay markaas dawladaha krishtaanka ah ee yurub isu gaashaan buursadeen oo ayagoo wada jira soo weerareen, ayna jebiyeen.

Markaasaa waxaa Spaaniya boqorad u noqotay haweeney. Boqoraddaas waxay dalka kusoo rogtay diinta krishtaanka, oo ay markaas Carab badani kasoo haajireen.

Dadka soo haajirayna waxaa ka mid ahaa qabiilkaan Xaatim\حاتم oo ay qaarba meel degeen laga bilaabo Morokko ilaa Baraawe iyo inta u dhexeysa.
Taas ayaa u sabab ahayd inay Baraawe soo degaan.

Yuhuudda dalkaas Spaaniya degganayd waxaa lagu khasbay inay katoolik noqdaan, oo ay diintooda ka baxaan. Taas ayaa u sabab ahayd in shan boqol oo sano kaddib, markuu sanadku ahaa kun sagaal boqol laba iyo sagaashan uu boqorka Spaaniya yuhuudda usoo jeediyay inay muquunintaas raalli ka noqdaan, markuu Madrid ka furayay shirka ay maraykanka iyo Midowga Soofyeeti goob jood ka ahaayeen wada hadallada dhex marayey Yaasir Carafaat\ياسر عرفات oo ahaa Madaxweynaha Falasdhiin\فلسطين iyo Wasiirka koowaad ee Yuhuudda.
Sanadkaas kun afar boqol iyo laba iyo sagaashanka ayay boqoraddaasu waxay maal ka amaahatay, ayaa la yiri, isagaa iskiis u bixiyayna waa la yiri, nin Carab ah oo muslin ah oo ay markaas Cristoforo Colombo ku maal gelisay safarkiisa uu Amerika ku helay, isagoo ay laba ka mid ah naakhuudayaalka saddexdiisa doon – oo magacoodu ahaa Nina iyo Pinta iyo Santa Maria - waday muslin walaalo is dhashay ahaayeen. Markuu soo gaaray jaziiradda Kuuba wuxuu waqooyigeeda ku arkay masjid qurux

badan oo ka dhisnaa buur dhaladeed, taasoo u daliil ah inuu islaamku Amerika soo gaaray ka hor intay yurub baran oo helin.

Waxaa sidaas noogu dhammaaday kitaabka Cadiyyu bin Xaatim **عدي بن حاتم**, waxaanna ku gunaanadeynnaa annago leh wa al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina, wa Sallaa Allaahu Calaa Sayyidinaa wa Mawlaana Muxammadin wa Calaa Aalihi wa Saxbihi wa man tabicahum bi ixsaanin ilaa Yawi Al Ddiini wa Sallam Tasliiman kathiiran **الحمد لله والثناء لله وصلى الله على سيدنا ومولانا محمد وعلى آله الطاهرين الطيبين وسلم تسليما كثيراكلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون**.

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan wuxuu ku dashay Gaalkacyo degmadaasoo uu aabihiis qaalli ka ahaa, dayrtii la magac baxday Hoobaaq. Hoobaaq waa beel daaqsiin ah oo ka mid ah dooxada Golol, halkaasoo ay eedi ku kala gaartay labada qabiil ee Cumar Maxamuud iyo Sacad dayrtaas, eedaasoo bilaabatay 1943 socotayna ilaa 1944. Xasanweli wuxuu u dhashay Shiikhaal Looboge, oo ah Quraysh, ayagoo ah ubadka Abuu Bakar Al Ssddiiqu, Saaxiibka iyo ina adeerka iyo soddogga Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Looboge aabihiis Fiqi

Cumar wuxuu ku noolaa Boqortooyada Harar siday u warisay tirada lix boqol iyo sagaal iyo afartan ee wargeyska dalka Sucuudiga kasoo baxa ee la yiraahdo Al Muslimuuna, soona baxay maalinta Jimce ee toddobada bisha Rabiicu al Awwal ee sanadka Hijriga ah ee kun iyo afar boqol iyo sideed iyo toban, una dhigantah kow iyo tobanka bisha Luulyo ee sanadka kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo sagaashanka, boggiisa tobanaad. Yuusuf Cabdu Al Raxmaan Shiikh oo maqaaladaas qoray wuxuu ku yiri: "Kaddib markay saliibiyiinta krishtaanka ahi ay gacanta ku dhigeen Bayti Al Maqdis, dhammaadka qarniga shan iyo tobnaad ee Miilaadiga ah iyo dhammaadka kan shanaad ee Hijriga, ayna ku sugnaadeen Shaam, ayna gacanta ku dhigeen Khaliiju Al Caqabah ee ku dara Badda Cas, ayay krishtaanku waxay raadiyeen cid ay is gaashaanbuursadaan, oo Badda Cas xagga koofureed uga goysa. Markaasey waxay heleen xabshada krishtaanka ah oo ay markaas gaashaanbuur la noqdeen, ayna kula heshiiyeen inay iska kaashadaan la dagaallanka islaamka iyo muslimiintaba, kuna gaaray taas inay xabashadu kusoo duusho oo ay qabsato Boqortooyada Islaamka ee Harar, taasoo gogol dhig u noqoneysa ku duulidda Xijaaz iyo duminta Kacbada la Sharfay. Sidaas ayayna ku heshiiyeen. Markaasey xabashadu waxay kusoo duushay Harar, waxaana usoo baxay oo ka hortegey Al Shiikh Abaadir oo soomaalidu u taqaanno Fiqi Cumar, ahna aabaha dhalay Aw Qudhub. Markaasuu Amiir Cumar bin Shamsu Al Ddiin (oo ah Fiqi Cumar) si xun u jebiyay oo ka adkaaday. Markaasey xabshadu waxay ka gargaar iyo gurmad dalbeen gaashaanbuurtooda krishtaanka ah. Qaylo dhaankoodaas waxaa kasoo jawaabay Richard the Lion-heart oo ahaa boqorka ingiriiska, ahaana maareeyaha hawlaha ka socday bariga dhexe "Bariga Carabta". Richard wuxuu soo diray ciidammadiisa ka kooban burtuqiis iyo talyaani, si ay xabashada ugu gargaaraan. Ciidammadaani waxay gacanta ku dhigeen oo qabsadeen dekadaha ay Harar lahayd oo ah Zaylac iyo Barbara iyo Bulaxaar, kuwaanoo hadda ku yaalla gobolka waqooyi ee Jamhuuriyada Soomaaliya. Ciidammadaasu waxay soo gaareen ilaa dusha magaalada Harar. Markaasey Imaarada Makkah Al Mukarramah iyo Yaman ayay waxay Harar usoo direen ciidammo gurmad ah. Sidaas ayay ciidammada Islaamku uga adkaadeen kuwa krishtaanka ah, uusanna krishtaamiinta Shaam uga laaban hal askariba ha ahaadee, ayadoo dhammaantood lagu laayey inta u dhexeysa Harar iyo Muqdisho iyo Barbara. Muqdisho waxay Harar usoo dirtay gurmad ahaan fardo iyo hub." Xasanweli wuxuu 1970 ka qalin jebiyay Jaamacadda Bologna ee dalka Talyaaniga halkaasoo uu ku bartay takhtarnimada xoolaha. Kaddib wuxuu noqday macallin Dugsiga Sare ee Xasan Barsane ee Muqdisho, Macallin Kulliyada Daawada Xoolaha ee Jaamacadda Qaranka Soomaaliyeed, Xildhibaan Golaha Shacbiga Qaranka ee Soomaaliya, Danjiraha Soomaaliya ee Dawlado Yurub ah, kaddibna wuxuu ku wareegay Jaamacadda Dawladaha Carabta, uuna noqday Danjireheeda Kenya, iyo Danjireheeda Qarammada Midoobay ee Vienna. Kaddib wuxuu soo degay USA, wuxuuna noqday Macallin Dugsiga Sare ee English High School ee Boston, Baare

Shareecada Islaamka ee Islamic Legal Studies Program ee Harvard Law School ee Harvard University ee Cambridge. Siirada Ibnu Hishaam ayuu soomaali ku tarjumay 180 cajaloodna ku duubay. Kaddib wuxuu ilaa sideed sano ka ahaa imaam masjidyada xabsiyada ku yaalla gobolka Massachusetts oo ay Boston caasimadda u tahay ee dalka maraykanka, halkaasoo uu dadka xabbisan ku salaadana tujin jiray, barina jiray diinta islaamka, hortiisana ay ku islaameen khalqi badan oo rag iyo dumarba leh, uuna shahaadada xaqqa ah u mariyay, mahaddana Ilaahay ayaa iska leh.